

# Waxa Ay Wasaaradaha Samayn Karaan Si Ay Waxbarashada Uga Difaacaan Weerarrada Iyo In Iskuullada Loo Adeegsado Ujeedooyin Milateri

## Liiska Waxqabadka

Isbahaysiga Caalamiga ah
**Ee Ka Hortagga Weerarrada Ka Dhanka Ah Waxbarashada**

GCPEA



**Gantaal ku dhacay saqafka kore ee qolka jimicsiga 33 Iskuul sare oo ku yaal Donetsk, Ukraine, ka dib duqeyn ay Dowladda Ukraine geysatay 27-kii Agoost 2014.**

*© 2014 John Macdougall/AFP/Getty Images*

# Waxa Ay Wasaaradaha Samayn Karaan Si Ay Waxbarashada Uga Difaacaan Weerarrada Iyo In Iskuullada Loo Adeegsado Ujeedooyin Milateri

## Liiska Waxqabadka

Disembar 2015

---

GCPEA
Isbahaysiga Caalamiga ah **Ee Ka Hortagga Weerarrada Ka Dhanka Ah Waxbarashada**

Isbahaysiga Caalamiga ah **Ee Ka Hortagga Weerarrada Ka Dhanka Ah Waxbarashada**

GCPEA

## Faahfaahin ku saabsan Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada (GCPEA)

Liiska Waxqabadka ayaa waxaa daabacay Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada (GCPEA), kaasoo ay sanadkii 2010 asaaseen ururo ka shaqeeya waxbarashada dalalka ay ka jiraan xaaladaha degdegga ah iyo kuwa ay saameeyeen colaadaha, iyo hay'addo ka shaqeeya tacliinta sare, difaacidda xuquuqda carruurta iyo shuruucda caalamiga ah ee bani'aadannimada, kuwaasoo ka walaacsan weerarrada ka dhanka ah xarumaha waxbarashada, ardada iyo shaqaalaha ku sugan dalkaasi.

GCPEA waa isbahaysi ay xubin ka yihiin ururada ay ka mid yihiin:

- The Council for At-Risk Academics (CARA)
- Human Rights Watch
- The Institute of International Education
- Norwegian Refugee Council
- The Office of the United Nations High Commissioner for Refugees (UNHCR)
- Protect Education in Insecurity and Conflict (PEIC waa mashruuc ay leedahay hay'adda Education Above All)
- Save the Children
- The Scholars at Risk Network
- The United Nations Children's Fund (UNICEF)
- The United Nations Educational, Scientific and Cultural Organization (UNESCO)
- War Child Holland

GCPEA waa mashruuc ay fulinayso xarunta Tides Center, oo ah urur aan faa'iido raadis ahayn (501(c)(3)) oo fadhigiisu yahay Maraykanka.

Liiskan waxqabadka ayaa laga diyaariyay cilmi baaris uu dad u diray isbahaysiga GCPEA. Waa mid ka madax bannaan hay'adaha xubinta ka ah guddiga joogta ah ee GCPEA, loomana qaadan karo mid ka turjumaya afkaarta hay'adaha xubinta ka ah guddigaasi.

## Mahadcelin

sbahaysiga GCPEA waxa uu si weyn ugu mahadcelinayaa taageerada deeqsinimada leh ee hay'adaha PEIC, UNICEF, iyo deeq bixiye aan rabin in la shaaciyo. Liiska Waxqabadka ayaa waxaa markii hore isku duwday Cynthia Koons, oo la taliye u ah GCPEA. Isbahaysiga GCPEA waxa uu ka

Esther Akumu Achire
Madeeha Ansari
Lyndsay Bird
Emily Echessa
Sarah Green
Filipa Schmitz Guinote
Bilal Al Hamayadah
Jo Kelcey
Chrissie Monaghan
Andrea Naletto
Diya Nijhowne
Sarah Nogueira-Sanca
Margaret Sinclair
Chris Talbot
Ticiana Garcia-Tapia
Bashir Al Tukur
Anya Azaryeva Valente
Stephen Wordsworth

# JADWALKA MOWDUUCYADA


**Hordhac** 2

**Liiska Waxqabadka** 4

1. Qiimee xaaladda oo dusha kala soco weerarrada 4
2. Xaqiiji ammaanka iskuullada 12
3. Xaqiiji sii socoshada waxbarashada 17
4. Taageer bulshooyinka 20
5. Dareensanow colaadda 27
6. Nidaami difaaca waxbarashada 32
7. U ololee taageeradda 37

**Lifaaqyo** 44

Tilmaamaha ka hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada ay Dagaalladu Socdaan 44

Bayaanka Badqabka Iskuullada 46

Shuruucda Caalamiga ah ee Khuseeya 48

# HORDHAC

Liiska waxqabadka ayaa la qoray ayada oo la aqoonsan yahay in:

**Canug kasta uu xaq u leeyahay waxbarasho.**

**Dalalka, gaar ahaan wasaaradahooda ayaa waxa uu waajib ka saaran yahay in si waafaqsan Sharciga Caalamiga ah ay u ilaaliyaan xuquuqda helitaanka waxbarasho ee ay carruurta oo dhan leeyihiin, gaar ahaan ilmaha iyo dhalinyarada ku nool goobaha ay xasaradaha ka taagan yihiin.**[1] Dalal badan ayaa xuquuqda helitaanka waxbarashada ku daray dastuurkooda qaran.[2]

**Sidaa oo ay tahayna, malaayiin carruur ah oo ku nool goobaha ay colaadaha saameeyeen ayaan haysan xuquuqda helitaanka waxbarashada.** Tusaale ahaan, Hay'adda Qaramada Midoobay ee Waxbarashada, Sayniska iyo Dhaqanka (UNESCO) ayaa qiyaastay in carruur ka badan 20 milyan oo gaaray da'da lagu aaddo iskuulka, kuna nool dalalka ay colaadda saamaysay aanay haysan waxbarasho.[3]

**Ardada, macallimiinta iyo iskuullada ayaa si toos ah loola beegsadaa weerarrada iyo rabshadaha.** Kumannaan ah ardada iskuullada iyo jaamacadaha,macallimiin, aqoonyahanno iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada ayaa lagu weerarray in ka badan 70 dal mudadii u dhexeysay 2009-2013, ayadoo weerarradaasi badankooda ay ka dhaceen 30 waddan.[4] Lix ka mid ah dalalkaasi ayaa weerarrada waxa ay saameeyeen in ka badan 1,000 xarumood ama shakhsiyaad.[5] Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada (GCPEA) ayaa diiwaangeliyay weerarro ula kac ah ayna ka mid yihiin "duqeynta ama gubidda iskuullada ama jaamacadaha" iyo "dilka, dhaawaca, afduubka, xariga sharci darrada ah ama jirdilka loo geysto ardada, macallimiinta iyo aqoonyahannada"[6] ee colaadaha ka taagan caalamka. Dadka geysta weerarrada ka dhanka ah waxbarashada ayaa waxaa ka mid ah ciidamada dowladaha, booliska, laamaha sirdoonka, kooxo dembiilayaal ah, dad rabshada samaynaya, ciidamada sida milateriga u tababaran, iyo maleeshiyaad taabacsan dowladaha iyo ururada aan dowliga ahauyn.

**Dhinacyada dagaallamaya ayaa inta badan iskuullada u adeegsada colaadaha ka taagan caalamka.** Isbahaysiga GCPEA ayaa diiwaangeliyay in toban sano oo lasoo dhaafay ay iskuullada iyo jaamacadaha ku yaal 26 dal loo adeegsaday ujeedooyin milateri – dalalkaasi oo intooda badan ay ka jireen colaado hubaysan mudadii u dhexeysay 2005-2015.[7] Iskuullada iyo jaamacadaha ayaa waxa saldhigyo, xarumo jirdil, gabbaad, meel ay biyaha ka helaan iyo musqulo (ujeedooyin milateri oo kale) u adeegsaday dhinacyada dagaallamayay (sida ciidamada dowladaha, kuwa aan dowliga ahayn, iyo xooggag caalami ah) Waxaa sidoo kale ay ka dhigteen makhaasiino hub, xabsiyo iyo goobo lagu askareeyo carruurta.[8]

Saamaynta xun ee weerarrada xarumaha waxbarashada uga yimaada dhinacyada dagaallamaya ayaa ah kuwo siyaasadeed, dhaqaale, iyo bulsho isla markaana ah kuwo degdeg ah ama mustaqbalka fog. Marka uu ciidan galo xarumaha waxbarashada ayaa waxa ay taasi ka dhigaysaa kuwo ay weerarri karaan dhinaca kale, sidaana khatar ku gelinaya ardada iyo macallimiinta, una soo jiidaya khatar dhibaateyn muuqata ah, tacaddiyo galmo, qasab ku shaqaaleysiin, dhaawac iyo xataa dhimasho.[9] Weerarrada ka dhanka ah iskuullada, macallimiinta iyo ardada ayaa dhalin kara shoog, waxbarashada oo hakad gasha, dhismayaasha oo burbura, barayaasha oo yaraada, dhaawac iyo dhimasho.

**Maxay tahay ujeedada Liiska Waxqabadka?** Liiska Waxqabadka ayaa looga gol leeyahay inuu noqdo mid awood siiya shaqaalaha wasaaradaha ku hawlan waxbarashada (oo dukumiintigan loogu yeeri doono 'Wasaaradaha' ama 'Wasaaradda') si ay waxbarashada uga difaacaan weerarrada ama in xarumaheeda loo adeegsado ujeedooyin milateri, isla markaana loo yareeyo saamaynta ay reebaan weerarrada, loogana fal-celiyo marka ay dhacaan.

**Xagee ayuu macluumaadka ka keenay Liiska Waxqabadka?** Tallaabooyinka ku xusan liiskan ayaa waxaa laga soo ururiyay qoraallo ay sameeyeen isbahaysiga GCPEA iyo ururada xubnaha ka ah.

Inkastoo dukumiintigan diiradda lagu saarayo iskuullada, ayaa haddana qaar badan oo ka mid ah talooyinka ku xusan waxaa loo adeegsadan karaa jaamacadaha ama xarumaha kale ee waxbarashada (sida xarumaha tababarka xirfadaha).

**Qaabkee loo habeeyay?** Tallaabooyinka lagula taliyay Wasaaradaha si ay waxbarashada uga difaacaan weerarrada ayaa ka kooban todobo qeybood:[10]

1 Qiimee xaaladda oo dusha kala soco weerarrada
2 Xaqiiji ammaanka iskuullada
3 Xaqiiji sii socoshada waxbarashada
4 Taageer bulshooyinka
5 Noqo qof dareensan colaadda
6 Nidaami difaaca waxbarashada
7 U ololee taageeradda, gaar ahaan in dalalka ay ansixiyaan Bayaanka Badqabka Iskuullada[11] ayna fuliyaanka Tilmaamaha ka Hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada ay Dagaalladu Socdaan[12] (Eeg Lifaaqa 1)

**Qaabkee loo adeegsanayaa Liiska Waxbaqabka?**

Dadka adeegsanaya waxaa lagu dhiiragelinayaa:

1 Inay doortaan waxqabadka muhiimka u ah xaaladda
2 Inay adeegsiga ku saleeyaan xaaladda dalka ka jirta
3 Inay waxqabadka ka dhigaan heer qaran, gobol, degmo iyo iskuul
4 Inay ku biiriyaan liiska waxqabadka ay u arkaan muhiim




**Waxa Ay Wasaaradaha Samayn Karaan Si Ay Waxbarashada Uga Difaacaan Weerarrada Iyo In Iskuullada Loo Adeegsado Ujeedooyin Milateri**

*© 2014 Mohammed Abed/AFP/Getty Images*

# LIISKA WAXQABADKA

## 1. Qiimee xaaladda oo dusha kala soco weerarrada

### Tani maxay ka dhigan tahay?

Mid ka mid ah waxqabadk ugu horreeya ee ay Wasaraadaha samayn karaan si ay iskuullada uga difaacaan weerarrada[13] ayna ugu hortagaan in loo adeegsado ujeedooyin milateri[14] ayaa ah inay qiimeeyaan xaaladda taagan. Sidaa awgeed, qiimeynta ayaa loola jeeda: in la aqoonsado farqiga dhanka aqoonta ah; la ururiyo macluumaadka; la darso qaabka, inta ay la egtahay iyo saamaynta ay yeelan karto dhibaatada.

Dusha kala socoshada ayaa loola jeedaa in waxqabadka si nidaamsan muddo gudaheed dabagal loogu sameeyo. Dusha kala socoshada la xiriirta difaaca waxbarashada ayaa u baahan in si joogta ah loo ururiyo macluumaadka (tayo iyo tiraba) leh ee ku aaddan:

- ❑ Dhacdada, nooca weerarka iyo adeegsiga milateri; iyo
- ❑ Fulinta iyo natiijada mashaariicda iyo siyaasadaha loogu talagalay in wax looga qabto dhibaatada.

### Maxay muhiim u tahay?

Ka hor inta aanay shaqaalaha wasaaradda diyaarin istaraatijiyad ku haboon oo wax looga qabanayo weerarrada ka dhanka ah waxbarashada ama u adeegsiga ujeedooyin milateri, ayaaa waxaa loo baahan yahay in la qiimeeyo xaaladda markaa taagan. Ujeedada arintaa laga leeyahay ayaa ah in la fahmo qaabka (tusaale ahaan nooca weerarka, waxa dhiirageliyay iyo soo noq-noqoshadiisa), xaddiga uu gaarsiisan yahay weerarka lala beegsaday waxbarashada iyo u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee goobaha waxbarashada, si loogu daro diyaarinta iyo fulinta tallaabooyinka lagu difaacayo tacliinta.

Waxaa muhiim ah in si nidaamsan oo joogta ah dabagal loo sameeyo, maadaama ay colaaduhu yihiin kuwo isbedelaya. Macluumaad si joogta ah oo nidaamsan loo ururiyay ayaa gacan ka geysan kara in la aqoonsado deegaannada cusub ee baahida qaba, iyo kuwa doonaya in la gaarsiiyo jawaab-celinta jirta.

## Qaabka loo samaynayo?

### Samee qiimeynta farqiga

➢ Samee qiimeynta farqiga macluumaadka si aad u ogaato xogta la hayo iyo tan loo baahan yahay ee ku aaddan weerarrada ka dhanka ah goobaha waxbarashada iyo u adeegsigooda ujeedooyinka milateri. Ogow in wasaaradda ay hayso ama heli karto macluumaad ka jawaabaya su'aalaha soo socda:[15]

### Weerarrada ka dhanka ah waxbarashada

- ❑ Waa kuwee xarumaha waxbarashada ee khatarta gaarka ah ugu jira weerarrada?
- ❑ Imisa xarumaha waxbarashada ah ayaa la weerarray 12-kii bilood ee ugu dambeeyay, waa kuwee?
- ❑ Imisa weerar oo ka dhan ah macallimiinta ayaa dhacay 12-kii bilood ee lasoo dhaafay, noocyada weerarradaasi iyo tirada macallimiinta ay saameeyeen (ayagoo loo kala saarayo jinsiga, heerkooda iwm)?
- ❑ Imisa weerar oo dhan ah shaqaalaha waxbarashada[16] ayaa dhacay 12-kii bilood ee lasoo dhaafay, noocyada weerarradaasi iyo tirada shaqaalaha ay saameeyeen (ayagoo loo kala saarayo jinsiga, heerkooda iwm)?
- ❑ Imisa weerar oo dhan ah ardada ayaa dhacay 12-kii bilood ee lasoo dhaafay, noocyada weerarradaasi iyo tirada ardada ay saameeyeen (ayagoo loo kala saarayo jinsiga, heerkooda iwm)?
- ❑ Yaa geystay weerarradaasi?
- ❑ Maxay tahay sababta loo fuliyay?
- ❑ Maxaa dhacay? Intee ayuu la ekaa khasaaraha ka dhashay weerarka?
- ❑ Yaa mas'uul ka ah inuu wasaaradda ku wargeliyo weerarrada?
- ❑ Weerar kasta oo lasoo sheegay, maxay ahayd caawinnaada uu dalbaday iskuulka, yuuse ka codsaday (tusaale wasaaradda, booliska/xooggaga ammaanka)?
- ❑ Intuu gaarsiisnaa adkeysiga iskuulka la weerarray[17]: Meeqa maalmood weerarka dib ayuu dib u billaabay waxbarashada?

### U adeegsiga iskuullada ujeedooyinka milater

- ❑ Waa kuwee iskuullada khatarta ugu jira in loo adeegsadu ujeedooyin milateri iyo sababta?
- ❑ Imisa iskuul ama xarumaha kale ee waxbarashada ayay dhinacyada dagaallamaya u adeegsadeen 12-kii bilood ee lasoo dhaafay, yaase adeegsaday?
- ❑ Adeegsigaasi ma yahay mid muddo kooban (tusaale maalmo yar) ama mid muddo dheer?
- ❑ Qaab noocee ah ayay dhinacyada ku lugta leh colaadda u adeegsadaan iskuullada ama xarumaha waxbarashada (tusaale fariisimo, keyd hub iwm)?
- ❑ Adeegsiga noocaasi ah ma waxa uu dhaliyaa in iskuulka ama xarunta waxbarashada gebi ahaanba la

xiro ama in waxbarashada ay sii socoto ayadoo ay xooggaga hubaysan adeegsanayaan xarunta?

➢ Samee qiimeynta farqiga macluumaadka si aad u ogaato tallaabooyinka difaaca ee jira iyo kuwa loo baahan yahay.

- Weerarka ka dib muxuu yahay hannaanka rasmiga ah ee uu iskuulka ku codsan karo caawinaad, yuuse ka codsanayaa? Maamulka maxalliga ah/gobolka ama qaranka? Caawinnaad noocee ah ayaa horay loo bixiyay? Sidoo kale tixgeli in iskuulka uu codsaday caawinnaad iyo cidda uu ka codsaday.
- Maxay yihiin tallaabooyinka difaaca, sida kuwa ku xusan Liiskan Waxqabadka, ee loogu talagalay in looga hortago, lagu dhimo ama looga jawaab-celiyo weerarrada ka dhanka ah waxbarashada ama in iskuullada ay dhinacyada dagaallamaya u adeegsadaan ujeedooyin milateri? Qaabkee, ciddee, goortee iyo meeshee ayaa laga fuliyay?
- Ma jirtaa siyaasad ay dowladda ka degsatay u adeegsiga iskuullada iyo xarumaha waxbarashada ujeedooyin milateri? Haddii ay jirto maxay ka hadlaysaa? Qaabkee loo hirgeliyay?

## Samee qorsho qiimeyn iyo dusha kala socosho

- ❑ Haddii ay xogtu jirto, ka xaqiiji dhowr dhinac
- ❑ Haddii macluumaadka loo baahan yahay, go'aan ka gaar cidda ururinaysa, goorta iyo qaabka.
- ❑ Haddii ay suuragal tahay, adeegso nidaamyada jira, sida ururinta macluumaadka ee hannaanka MRM ee Qaramada Midoobay,[18] dib-u-eegista sanadlaha ah ee waaxda iyo siyaasadda, baaritaanka waaxda waxbarashada(ESD),[19] iyo/ama Hannaanka Maareynta Macluumaadka Waxbarashada(EMIS).[20]
- ❑ Aqri warbixinnada sanadlaha ah iyo bandhigyada ku aaddan weerarrada ka dhanka ah waxbarashada, tusaale ahaan kuwa ay diyaariyeen Kooxda Waxbarashada, ururada xuquuqda aadanaha, hay'adaha aan dowliga ahayn, iyo/ama Waxbixinta Sanadlaha ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay uu kaga hadlo Carruurta iyo Colaadaha Hubaysan, xogtoodana u adeegso barnaamijta iyo siyaasadaha wasaaradda.
- ❑ U ogolow macluumaadka, sida ugu haboonna u taageer dhinacyada ka shaqeeya ilaalinta xuquuqda carruurta, kooxaha waxbarashada iyo difaaca carruurta, waaxda hawlgallada nabad ilaalinta, UNICEF, UNESCO, hannaanka MRM ee Qaramada Midoobay ay ku dabagasho tacaddiyada waaweyn ee ka dhanka ah carruurta ku sugan goobaha colaadda, iyo dowladaha deeq-bixiyayaasha ah ee dusha kala socda weerarrada ka dhanka ah iskuullada iyo u adeegsigooda ujeedooyinka milateri.
- ❑ Adeegso qaabab ka qeyb-gelin leh, sida hannaan loo dhan yahay oo ay ku wada jiraan ragga iyo dumarka, dood kooxeed iyo in bulshada ay hubiso macluumaadka la ururiyay, si xog looga helo dhinacyada kale duwan, ayna uga hadlaan nooca, xajmiga iyo saamaynta ay reebaan weerarrada iyo adeegsiga milateri ee lagula kaco xarumaha waxbarashada.
- ❑ Ka baaraandeg cidda ururinaysa macluumaadka; qaabka loo xaqiijin karo hufnaanta, isla xisaabtanka iyo hubinta macluumaadka la ururiyay; sida dadka macluumaadka ururinaya looga arki karo deegaanka ay ka shaqeynayaan; iyo sida arigtidaasi ay u saameyn karto xogta la ururiyay.
- ❑ Si gaar ah uga taxadar saamaynta ay weerarrada iyo u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee xarumaha waxbarashada ku yeesheen gabdhaha/wiilasha, ragga/dumarka.
- ❑ Ku dar qiimeynta tirada ah (sida soo noq-noqoshada iyo tirada weerarrada) iyo midda tayada ah (sida waxa ay saamileyda waxbarashada ka rumaysan yihiin sababaha keena weerarrada).[21]
- ❑ Ku sale qaabka iyo xaddiga qorshaha dusha kala socoshada dabeecadaha gaarka ah ee xaaladda jirta (tusaale ahaan, tixgeli deegaannada aanay suuragalka ahayn in laga ururiyo macluumaadka khatarta ammaanka awgeed, ama deegaannada ku haboon in macluumaadka laga ururiyo).
- ❑ Ka qeyb-gal guddiyada hay'aduhu wadaagaan ee looga hadlo difaaca carruurta ama waxbarashada, sida Kooxda Waxbarashada, Madasha Yareynta Musiibooyinka, shabakadaha nabad dhiska, Kooxda Difaaca Carruurta iyo hay'adaha kale ee maxalliga ah ee qaabilsan waxbarashada.
- ❑ Si joogta ah dib-u-eegis ugu same hannaanka macluumaad ururinta si aad u hubiso inaanay jirin cid khatar lagu geliyay.

## Qiimeynta ka qeyb-geli bulshada maxalliga ah iyo hawlwadaagayaasha

➢ Ka qeyb-geli xubnaha bulshada qiimeynta nooca weerarrada iyo u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee xarumaha waxbarashada, gaar ahaan ragga, dumarka, carruurta iyo dhalinyarada kasoo jeeda qeybaha nugul ee la gacan bidixeeyo.

➢ Ka qeyb-geli xubnaha soo socda qiimeynta nooca weerarrada iyo u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee xarumaha:

- Kooxda Waxbarashada[22] ama ururada waxbarashada ee maxalliga ah;
- Kooxda Difaaca;[23]
- Hay'adaha aan dowliga ahayn (NGOs) ee ku hawlan waxbarashada iyo/ama nabad dhiska;
- Ururada Macallimiinta;
- Jaamacadaha; iyo
- Xarumaha Cilmi-baarista.

➢ Xaqiiji in aanay jirin cid khatar ku gasha hannaanka ururinta macluumaadka iyo qiimeyntiisa, ayadoo la samaynayo, lana joogteynayo borotokoolka ammaanka iyo badqabka.

### Tilmaan

Xaaladaha aan lagu adeegsan karin qaababka EDS ama EMIS, ka feker kuwan bedelka ah:

- ❑ Dib-u-eegis ku same waxbixinnada la diyaariyay, sida kuwa ay sameeyeen Human Rights Watch, Save the Children, UNICEF, UNESCO, iyo Search for Common Ground;
- ❑ Samee daraasad yar oo dad kooban lagu salaysan[24] taasoo ku aaddan iskuullada la ogyahay inay khatar ugu jiraan weerarrada iyo in loo adeegsado ujeedooyin milateri;
- ❑ Magacow koox yar oo jawaab-celinta degdega ah[25] (taasoo ka kooban khubaro maxalli iyo ajaanib ah) taasoo deegaannada ay colaaddu saamaysay ka diyaarisa qiimeynta baahida degdega ah; iyo
- ❑ Wada shaqeyn la yeelo hay'adaha awoodda u leh inay baaraan xiriirka ka dhexeeya waxbarashada iyo colaadda, sida jaamacadaha, ururada xuquuqda aadanaha, kuwa cilmi-baarista, xubnaha Kooxda Waxbarashada, ururada waxbarashada ee maxalliga ah, hay'adaha Qaramada Midoobay ama kuwa aan dowliga ahayn.

## Si qoto dheer u falanqee xiriirka ka dhexeeya waxbarashada iyo colaadda

Waxaa muhiim ah in la fahmo waxa dhaliyay colaadda, si ay Wasaaradaha u qaataan siyaasado wax dhisaya, iyo tallaabooyin looga hortagayo xiisadda markii hore dhalisay colaadda. Waxaa lagu kala duwanaan karaa aragtida ku aaddan waxa dhaliyay colaadda. Xataa mararka ay adag tahay in la isu keeno aragtiyada siyaasadeed ee ku aaddan waxa colaadda dhaliyay, ayaa haddana waxaa muhiim ah in dhinacyo badan laga eego sida (deegaanka, diinta, qabiilka, jinsiga, dabaqadda noolasha, taageerada siyaasadeed, qaxootiga/bulshada martigelisay, iwm).

➢ Qiimee xiriirka ka dhexeeya waxbarashada iyo colaadda. Tusaale ahaan, baaritaan ku same:

## Su'aalaha la xiriira helitaanka waxbarashada

- ❑ Maxay yihiin waxyaabaha kala qeybinaya[26] iyo kuwa xiisadda ka dhex abuuraya bulshada waxbarashada?
- ❑ Ma jiraan dad[27] dareensan in laga saaray nidaamka waxbarashada? Waa kuwee? Sabab? Tusaale ahaan, carruurta qaar kuma biiri karaan iskuulka maadaama luuqada wax lagu baro aanay ahayn tan gurigooda looga hadlo.
- ❑ Ma jiraan dadd aan si fiican u dhigan dugsiyada sare ama jaamacadaha? Waa kuwee? Sabab?

- ❑ Ma jiraan dad dowladda wax ka tabanaya maadaama aanay helin waxbarasho (sida dhalinyarada qaxootiga ah ee aan ku biiri karin iskuullada, sababtoo ah lama aqoonsana shahaadooyinka ay dalkooda kala yimaadeen)? Yaan heli karin waxbarashada? Xaggee iyo sababta?
- ❑ Maxay yihiin baahida ammaan ee ay qabaan iskuullada? Maxay iskuullada kala kulmeen kooxaha hubaysan ee deegaanka ku sugan?

## Su'aalaha la xiriira manhajka waxbarashada

- ❑ Ma jirtaa koox u aragta in manhajka waxbarashada uu ka eexanayo (sida inuu kasoo horjeedo dhaqankooda, diintooda ama taariikhdooda)? Waa kuwee? Sabab?
- ❑ Ma yihiin buuggaagta waxbarashada kuwo si sax ah oo joogta ah uga turjumaya heybta ardada? Haddii aanay taa jirin, maxay tahay sababta?

## Su'aalaha la xiriira adkeysiga barnaamijta waxbarashada

- ❑ Maxay yihiin xiriiriyayaasha[28] iyo awoodda nabad dhiska ee waxbarashada bulshada?
- ❑ Iskuullada ku yaal deegaannada ay ku nool yihiin dadka kala heybta ah miyay dhigtaan ardo kala duwan? Deegaannadee ayay taasi ka dhacdaa ama aanay ka dhicin?

Marka la adeegsano macluumaadka laga helay su'aalahan si go'aan looga gaaro xiriirka ka dhexeeya waxbarashada iyo colaadda, waxaa muhiim ah in la tixgeliyo inta ay gaarsiisan yihiin dhacdooyinkaasi.

## Dusha kala soco hirgelinta iyo natiijada siyaasadaha iyo barnaamijta difaaca waxbarashada

➢➢ Dusha kala soco hirgelinta iyo natiijada siyaasadaha iyo barnaamijta ay Wasaaradda ka yeelatay difaaca waxbarashada (tusaale ahaan, ma yihiin kuwa muhiim ah? waxqabad leh? la joogteyn karo? oo wax ku ool ah?) Dib-u-eegis iyo cusbooneysiin joogta ah ku same siyaasadaha iyo barnaamijta adigoo ku salaynaya khibradaha la kororsaday iyo isbedelka ku yimid xaaladda.

➢ Adeegso tilmaamaha gaarka u ah barnaamijka iyo isbedelka xaaladda, iyo weliba qaabka SMART: Gaar ah, La Cabiri Karo, La Gaari Karo, Muhiim ah, Waqtina Leh.

➢ Kala sooc tilmaamaha si xogta ay u noqoto mid gaar ah oo lagu ogaan karo farqiga helitaanka waxbarashada ee dhalin kara colaadda.

➢ Isha ku hay saamaynta aan ku talagalka ahayn ee uu barnaamijka si khaldan khatar ugu gelin karo koox gaar ah (tusaale ahaan in iskuulka laga dhigo goob la ilaaliyay ayada oo aan marka hore lagala xaajoon dhinacyada hubaysan, ayaa xaruntaasi ka dhigi karta mid weerar lala beegsan karo).

## Daraasad xaalad: Barnaamijka Hormarinta Waaxda Waxbarashada, Qorshaha Wanaajinta Xogta ee Itoobiya

Barnaamijka Hormarinta Waaxda Waxbarashada ee Itoobiya IV 2010/2011-2014/2015 (2010) ayaa aqoonsaday in sideeda gobol ee ay saameynta ugu badan ku yeesheen xaaladaha degdega ah sida dagaal beeleedyada, ay haysteen macluumaad kooban oo ku aaddan saameynta ay xaaladahasi ku yeesheen waxbarashada. Si taasi wax looga qabto, ayaa barnaamijka waxa uu qaatay dhowr istaraatijiyadood:[29]

- ❑ Ururinta macluumaadka waxbarashada xaaladda degdega ah ku jirta (colaadda iyo musiibooyinka dabiiciga ah) si loogu adeegsado qorsheynta iyo miisaaniyadda barnaamijta waxbarashada ee gobolladaasi;
- ❑ In lagu daro macluumaadka waxbarashada xaaladda degdega ah qaababka kale ee xog ururinta sida EMIS;
- ❑ Samaynta qorshayaasha diyaarinta ka jawaab-celinta xaaladaha degdega ah; iyo
- ❑ Diyaarinta guddiga isu diyaarinta xaaladaha degdega ah si uu dusha ugala socdo qorshayaasha.

Inkastoo aanu gaar u ahayn weerarrada ka dhanka ah waxbarashada, ayaa haddana tusaalahan waxa uu muujinayaa sida qorshaha waxbarasho ee heer qaran uu: u aqoonsan karo saamaynta ay colaadda ku leedahay waxbarashada; u wanaajin karo macluumaadka ku aaddan saamayntaasi; u diyaarin karo xaalad qorsho looga jawaab-celinayo xaaladda degdega ah; iyo dusha kala socoshada jawaab-celinta.

## Intii muddo ah dusha kala soco weerarrada iyo u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee iskuullada

➢ Dusha kala soco isbedelka ku imanaya colaadda (dhinacyada, kala duwanaanta, heybta iyo sababta) ee xilliyada kala duwan, haddii ay suuragal tahayna, xiriir la same Wasaaradda Difaaca iyo/ama booliska maxalliga ah iyo laamaha ammaanka.
➢ Aqoonso – ama ha soo aqoonsadeen hay'adaha aad wada shaqeysaan – kormeerayaal maxalli ah oo kala duwan, ayna ku jiraan rag iyo dumar macallimiin ah, culimaa'udiinka, dhalinyarada, dumarka, ururada bulsahada, iyo kuwa rayidka ah.
➢ U tababar kormeerayaasha ragga iyo dumarka leh iyo/ama shaqaalaha waxbarashada qaabka loo sheego weerarrada, gaar ahaan macluumaadka ku aaddan kooxda fulisay, goobta, xilliga, qaabka iyo ula jeedada weerarka dhacay.
➢ Si joogta ah xiriir (is arag ah ama telefoon ah) ula yeelo kormeerayaasha maxalliga ah si aad uga hadashaan xaaladda ammaanka, warbixinnada weerarrada dhacay, iyo calaamadaha muujinaya in colaadda ay saamayn karto waxbarashada.

## Daraasad xaalad: Ku Daridda Dusha Kala Socosha Weerarrada ee Nidaamka Ka Jira Suudaanta Koonfureed30

Horraantii 2015, Wasaaradda Waxbarashada, Sayniska iyo Tiknoolajiyadda ee Suudaanta Koonfureed ayaa sheegtay inay ka gudbeyso nidaamka aan rasmiga ahayn ee dabagalka weerarrada iyo u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee iskuullada oo ay hirgelinayso mid rasmi ah. Istaraatajiyadaha la eegayo ayaa waxaa ka mid ah in tilmaamaha muhiimka ah lagu dari karo qaabka EMIS. Si taas loo sameeyo waa in Wasaaradda ay soo bandhigtaa siyaasad la fulin karo. Xilligan la joogo, Wasaaradda iyo hawlwadaageeda ayaa ka baaraandegaya qaabka looga gudbi karo caqabadaha horyaalla hirgelinta nidaamka, sida: in waxbarashada ay socoto xilliyada ay amni darrada jirto, shaqaalaha guurguura, isgaarsiin wanaagsan, iyo in la helo duulimaadyo aadi kara goobaha ay colaaddu ka jirto. Wasaaradda ayaa sidoo kale sheegtay inay tixgelinayso tallaabooyinka kale ee waxbarashada looga difaaci karo weerarrada, sida: in goobo bedel ah loo helo iskuullada ay colaadda saamaysay, in ilaalo hubaysan iyo kuwo aan hubaysneyn la geeyo iskuullada khatarta ku jira, in hab-raac loo sameeyo macallimiinta wajahaya xaaladda degdega ah, iyo dib-u-eegis lagu sameeyo manhajka si loogu daro nabad dhiska.

## Tilmaan

Marka ay kooban tahay xogta laga heli karo weerarrada ka dhanka ah waxbarashada ama u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee xarumaheeda amni darro awgeed, waxaa la tixgelin karaa tallaabooyinkan:

- ❑ Wada shaqeyn la yeelo dhinacyada ku sugan gobolka, sida kormeerayaasha nabada, ururada diinta, ama kuwa ka shaqeeya bulshada;
- ❑ Taageer tababarka nabad ilaaliyayaasha ama kormeerayaasha xuquuqda aadanaha ee weerarrada iyo u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee lagula kaco xarumaha waxbarashada, (sida in xarunta degmada aad ka siiso goob ay ku shiraan, la wadaagto macluumaadka, iyo inaad ka qeybgasho kulamada ay hay'adaha badan leeyihiin); iyo/ama
- ❑ Samee hannaan sugan oo qarsoodi ah kaasoo lagu wadaagi karo macluumaadka weerarrada iyo u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee lagula kaco xarumaha waxbarashada, isla markaana aan khatar galineyn kormeerayaasha iyo bulshada iskuulka.

## Kala shaqee dhinacyada si loo helo caddeyn waafi ah

Kala shaqee aqoonyahannada caalamiga ah, kuwa maxalliga ah, iyo hawlwadaagayaasha waxbarashada si:

- ➢ Loo sameeyo qiimeyn ku aaddan saamaynta, iyo si loo eego in isbedelka ku yimid weerarrada ka dhanka ah waxbarashada uu ka dhashay siyaasadaha iyo barnaamijta difaaca ee Wasaaradaha ama sababo kale.
- ➢ Samee cilmi-baaris isbar-bar dhig ah si loo ogaado barnaamijta ku wanaagsan xaaladaha gaar.
- ➢ La wadaag oo adeegso cilmi-baarista ku haboon jawaabaha difaaca waxbarashada.

## Adeegso xogta

- ➢ Qiimee khatarta[31] la xiriirta ururinta macluumaadka iyo ka warramideeda si go'aan looga gaaro qaabka ugu sugan una qarsoon[32] ee lagu tabin karo weerarrada ka dhanka ah waxbarashada.
- ➢ Sida ugu haboon xaaladda markaa taagan, ku wargeli macluumaadka weerarrada iyo u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee lagula kaco xarumaha waxbarashada: milateriga; the hannaanka garsoorka; UNICEF; UNESCO; guddiyada kormeera heshiisyada xuquuqda aadanaha, Guddiga Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka, Guddiga Xuquuqda Carruurta, Guddiga Xuquuqda Aadanaha iyo kuwa hoos yimaada sida wakiilka gaarka ah ee Xuquuqda Waxbarashada.
- ➢ U adeegso qiimeynta iyo macluumaadka kormeerka si aad ugu wargeliso hannaanka digniinta hore, qorshayaasha xaaladaha degdega ah (sida qorshayaasha daadgureynta iyo istaraatijiyadda dib loogu furayo iskuullada marka ay ammaan noqdaan), barnaamijta u ololeynta, isbedelka siyaasadda, iyo la xisaabtanka kuwa dembiga galay.[33]

## Daraasad xaalad: Samaynta Liiska Iskuullada Nugul ee Falastiin34

Laga billaabo 2010, Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ayaa adeegsan jirtay xogta kormeerayaasha si ay u aqoonsato una cusbooneysiiso liiska iskuullada ugu nugul. Si ay u qeexaan "ugu nugul" ayaa waxa ay diyaariyeen shuruudo gaar ah, sida in iskuulka toos loo duqeeyay; uu ku yaal deegaanka soohdinta ah ama aan la geli karin; uu leeyahay wadooyin aan ammaan ahayn; uu u dhaw yahay goobaha ammaanka ama xarumaha ay ku tababartaan kooxaha iska caabinta wada; ama uu u dhaw yahay godadka dhulka hoostiisa ah ee koonfurta marinka Gaza ee soohdinta Masar. Hay'adda UNESCO ayaa si weyn u adeegsatay macluumaadkan, ayadoo iskuulladaasi ku dartay barnaamijka Yareynta Khatarta Musiibada ee la fuliyay intii u dhexeysay 2011 iyo 2012 (eeg bogga 24).[35] Laga billaabo Nofembar 2015, 110 ka mid ah 395-ta iskuul ee ay dowladda ku leedahay marinka Gaza ayaa lagu daray liiska wasaaradda ee iskuullada ugu nugul.

## Muxuu yahay Hannaanka Dusha Kala Socoshada iyo Ka Warramidda ee Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay?[36]

Hannaanka Qaramada Midoobay ee Dusha Kala Socoshada iyo Ka Warramidda tacaddiyada ba'an ee ka dhanka ah carruurta ku sugan goobaha colaadda (MRM) ayaa waxaa sanadkii 2015 lagu asaasay qaraarka Golaha Ammaanka ee 1612, si loo soo afjaro, loogana hortago lixda tacaddi ee waaweyn, uuna ka midka yahay weerarrada ka dhanka ah iskuullada, cisbitaallada iyo shaqaalahooda. Qaraarka 1998 ee lasoo saaray sanadkii 2011, ayaa Golaha Ammaanka waxa uu ku sameeyay khudbadda sanadlaha ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay uu uga hadlo carruurta iyo colaadaha hubaysan. Marka dhinac qeyb ka ah dagaalka lagu xuso warbixintaasi ayaa waxaa looga baahan yahay inuu Qaramada Midoobay usoo bandhigo qorsho uu fulinayo si loo soo afjaro loogana hortago tacaddiyadaasi, ka dib ayaana liiska laga saari karaa. U adeegsiga iskuullada ujeedooyin milateri ayaan ka dhigneyn in kooxda sidaa fasha lagu daro liiska, maadaama aanay meel ka dhac ku ahayn sharciga bani'aadannimada. Haseyeeshee, Qaraarka 1998 ayaa Golaha Ammaanka waxa uu kaga codsaday Xoghayaha Guud inuu dusha kala socdo, isla markaana ka warramo u adeegsiga iskuullada ee ujeedooyinka milateri.

## Tilmaan

- ❑ Si joogta ah dib-u-eegis ugu samee xogta weerarrada iyo u adeegsiga iskuullada ujeedooyinka milateri.
- ❑ Tallaabooyinka ku haboon uga jawaab weerarrada la soo sheegay. Tusaale ahaan, samee taleefoon gaar ah oo ay dhibbanayaasha ka heli karaan macluumaadka ay rabaan sida adeegyada taageerada (sharciga, maskaxda iyo kuwa kale).

## Tixgelinta ku aaddan dusha kala socoshada iyo ka warramidda xaaladaha ay colaaddu jirto

- Waxaa khatar dhanka ammaanka ah geli kara kuwa ururinaya macluumaadka iyo kuwa ka warramaya weerarrada iyo u adeegsiga iskuullada ujeedooyinka milateri. Sidaa awgeed, samee qiimeyn joogta ah oo ku aaddan khatarta colaadda, haddii loo baahdana isbedel ku samee hannaanka kormeerka. Xaqiiji in aan qofna khatar u gelin ururinta iyo ka warramidda macluumaadka.
- Goobaha ay ku badan yihiin weerarrada iyo u adeegsiga iskuullada ujeedooyinka milateri, waxaa laga yaabaa inay caadi ka noqdeen oo aan loo sheegin kormeerayaasha. Adeegso qaabab ku haboon oo bulshada lagu wacyigelinayo xuquuqda ay u leeyihiin difaaca waxbarashada.
- Kormeerayaasha ayaa u nugul inay soo gudbiyaan warbixinno eex ku jiro. Ku tababar kormeerayaasha inay ka fogaadaan eexda, ayna si wax ku ool ah dusha ugala socdaan tacaddiyada ay geysanayaan dhammaan dhinacyada ku lugta leh colaadda.



Waardiye ku sugan iskuul lagu wareejiyay derbi adag si looga difaaco gantaallada iyo hoobiyayaasha, 24-kii Juun 2015, ee deegaanka kibbutz Nahal Oz, qeybta koonfureed ee Israa'iil una dhaw soohdinta marinka Gaza.

*© 2014 Menahem Kahana/AFP/Getty Images*

## 2. Xaqiiji ammaanka iskuullada

### Tani maxay ka dhigan tahay?

Sugidd ammaanka iskuullada ayaa waxaa loola jeeda in la siiyo qalab adag oo difaaci kara ardada, shaqaalaha waxbarashada iyo/ama iskuullada, sida: derbiga iskuulka, siliga sakiinta leh, layr iyo jidgooyo albaabka ah. Tixraac qaanadda macluumaadka ee ku taal bogga 19 si aad u ogaato khatarta ka dhalan karta sugidda ammaanka iskuullada.

### Maxay muhiim u tahay?

Difaaca muuqda ayaa la hirgeliyaa si looga hortago weerarrada ku iman kara waxbarashada, in la yareeyo dhibaatada ka dhalan karta iyo in la siiyo qaab isdifaac ah.[37]

## Qaabka loo samaynayo?

### Qiimee khatarta, oo yeelo qorsho ku haboon

- Isla eega wakiillada ka socda bulshada maxalliga ah qiimeynta iyo xogta kormeerka, si aad u aqoonsataan goobaha ay waxbarashada ku wajahayso khatar weyn oo uga timaada weerarrada ama u adeegsiga xarumaheeda ujeedooyin milateri (tusaale ahaan, wadooyinka iskuulka, noocyo gaar ah oo iskuullada ah, ama deegaanno gaar ah iwm.)
- Qeex heerka ugu hooseeya ee badqabka iskuullada ee dhammaan xarumaha waxbarashada, isla markaana qorsho u samee arimaha jinsiga ku salaysan (sida musqulaha ku haboon gabdhaha).
- Mudnaanta sii deegaannada loo aqoonsaday in xarumaha waxbarashada ay khatar ugu jiraan weerar, diyaarina qorsho nidaamsan oo wax ku ool ah si loo xaqiijiyo in iskuullada ay gaarsiisan yihiin heerka ugu hooseeya ee badqabka xarumaha waxbarashada.

### U samee iskuullada soohdin ammaan ah

- ➢ Dhis derbi soohdin ah, sida kuwa ka samaysan bulukeeti oo dusha laga saaray silig sakiin leh, oo sida ugu haboon loogu wareejiyay iskuulka.
- ➢ Hor dhig dhismaha jidgooyooyin ka samaysan dhagxaan iyo shamiinto, si gawaarida hubaysan looga horjoogsado inay galaan iskuulka.

### U dooro iskuullada deegaan, qaab iyo qalab dhismo oo ammaan ah[38]

- ➢ La kaasho maamulka, injineerada dhismaha, xubnaha bulshada iyo shaqaalaha dhismada si aad u doorto goobta iyo qalabka ugu badqabka badan ee lagu dhisi karo iskuulka (sida meel ka fog bartilmaameedyada milateriga).
- ➢ Dooro qaab dhismeed si cad u leh iridada daadgureynta iyo goobaha badbaadada (sida 'qolalka badbaadada' ee looga gaashaaman karo weerarrada iyo musiibooyinka dabiiciga ah. Sidoo kale ka taxadar dadka naafada ah).
- ➢ Mudnaanta sii wanaajinta iskuullada u nugul weerarka.

### Tilmaan

Qaabab u wanaagsan qorsheynta badqab wax ku ool ah oo ay iskuullada yeeshaan ayaa laga heli karaa: U diyaargarowga Musiibooyinka iyo Xaaladaha degdega ah: Hagidda Iskuullada (Iskaashiga Dhaqaalaha Caalamiga ah-Baangiga Adduunka, aan taariikh lahayn).[39]

Waxaa diyaar ah liis lasoo xushay oo qaababkaasi ah:

- Liiska U Diyaargarowga iyo U Adkeysiga Musiibooyinka ee Iskuullada
- Shaxda Qiimeynta Khatarta
- Liiska Dhisidda Iskuullo Badqaba
- Xaaladaha Tijaabinta Diyaargarowga
- Liiska Isu Diyaarinta Tijaabada
- Foomka Warbixinta Xaaladda Fasalka
- Foomka Dib-u-mideynta Ardayga/Qoyska
- Liiska Waxqabadka Xaaladaha Degdega ah

## Yaree khatarta weerarrada marka loo socdo iskuulka

- ➢ Bixi— ama la shaqee ururada maxalliga ah, waalidiinta, ama booliska bixin kara — gaadiid, kolonyo ama cid wehlisa ardada iyo/ama shaqaalaha waxbarashada marka ay aadayaan ama ka imanayaan iskuullada.
- ➢ Bedel jadwalka iskuulka si looga baaqsado in ardada iyo macallimiinta ay safraan xilliyada ay jirta khatarta ama colaadda.

## Samee ilaalo hubaysan ama aan hubaysneyn

- ➢ Samee ilaalo aan hubaysneyn, haddii loo baahdana hubaysan (waa haddii ay leeyihiin tababar ku haboon, cid la xisaabtanta iyo shahaado) si ay u difaacaan hantida iskuulka ayna uga shaqeeyaan badqabka ardada iyo shaqaalaha.
- ➢ Kala shaqee booliska maxalliga ah ama ururada bulshada si loo ilaaliyo iskuullada.

## Bixi qalabka ammaanka ee ku haboon

- ➢ Samee konteenaro iyo/ama goobo dhulka hoostiisa ah oo aanu qaraxa karin si xilliyada ay weerarrada dhacaan loogu keydiyo xogta waxbarashada, buugaagta, qalabka waxbaridda.
- ➢ Bixi qalabka badqabka sida kan gurmadka koobaad, dab demiska, matoorada korontada, makarafoono, iyo qalabka digniinta.

## Hadduu weerar dhaco, xaqiiji ammaanka iskuulka ka hor inta aan lagu laaban

- ➢ Samee borotokool ay qeyb ka yihiin hay'adaha dowladda ee muhiimka ah si loo qiimeeyo badqabka iskuulka la weerarray.
- ➢ Haddii iskuul la weerarray ama khatar ugu jira weerar la ogaado inuusan ammaan ahayn, u wareeji ardada, shaqaalaha waxbarashada (iyo qoysaskooda) iskuullo kale ayaga oo aan wax ganaax ah marin (sida mushaar la'aan ama in imtixaanka loo diido). Ku talagal kharashka safarka ee shaqaalaha waxbarashada iyo ardada haddii iskuulka loo wareejinayo uu ka fog yahay kooda.
- ➢ Marka la shaaciyo in iskuulka la weerarray uu ammaan yahay, sida ugu dhaqsaha badan dib ugu fur, si ardada, macallimiinta iyo bulshadaba aanu waqti dheeraad ah uga lumin.

## Daraasad xaalad: Tallaabooyinka Difaaca Muuqda ee Iskuullada Pakistan40

Ka dib weerarkii 2014 lagu qaaday iskuul ku yaal magaalada Peshawar ee dalka Pakistan, ayaa maamulka gobolka Punjab waxa uu soo saaray talo uu ku codsanayo in dhammaan iskuullada ay sare u qaadaan ammaankooda ayagoo adeegsanaya tallaabooyin gaar ah. Tallaabooyinka oo ka koobnaa 24 qodob ayaa waxaa ku jiray dhowr difaac muuqda ah, oo ay ka mid ahaayeen:

- ❑ Dhisidda gidaar soohdin ah oo ku wareegsan iskuulka, dhirirkiisuna gaarayo 8 fiit.
    - ❑ In gidaarka lagu wareejiyo silig sakiin ah oo dhirirkiisu gaarayo ilaa 2 fiit oo kale
    - ❑ Adeegsiga hal albaab oo laga baxo/galo, iyo mid labaad oo loo adeegsado xaaladaha qaar ama marinka degdega ah
    - ❑ In albaabka bixidda/galidda laga hordhiso jidgooyooyin adag
    - ❑ Samaynta albaab la dhexmaro oo leh qalabka biraha lagu ogaado si loo baaro dadka soo galaya, iyo in muraayadaha hoos wax ka arka lagu fiiriyo gawaarida soo galaya
    - ❑ Xaqiijinta in wadada laga soo galayo ay tahay mid leex-leexad ah, ayna yaalaan jidgooyooyin adag.

## Tilmaan

Waxaa suuragal ah in weerarrada si gaar ah loola beegsado hogaamiyayaasha bulshada, maamulka iskuulka, macallimiinta, iyo shaqaalaha waxbarashada. Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ka aaddan difaaca macallimiinta, eeg dukumiintiga GCPEA ee Ka Difaacidda Shaqaalaha Waxbarashada Weerarrada Beegsiga ah ee Dalalka ay Colaadda Ka Jirto (GCPEA 2014).[41]

## Difaac muuqda sii macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada

- U qeybi shaqaalaha waxbarashada telefoonnada gacanta iyo halow-halowga si ay ula xiriiraan kooxda gurmadka degdega ah.
- Kala shaqee Wasaaradda Difaaca iyo booliska maxalliga ah si loo xaqiijiyo in jawaab-celinta ay tahay mid degdeg ah, nidaamsan oo wax ku ool ah.
- Samee hannaan isgaarsiin oo jawaab-celinta degdega ah (sida farriinta gaaban) oo ay leeyihiin dhammaan qeybaha waxbarashada—macallimiinta iyo wasaaradda heerka qaran.
- Tixgeli in shaqaalaha waxbarashada la siiyo hub ay isku difaacaan iyo jaakadaha aanay xabbada karin.
- U dhis ardada iyo shaqaalaha waxbarashada guryo ay seexdaan, si loo yareeyo khatarta kasoo gaari karta wadooyinka ay ku yimaadaan ama kaga laabtaan iskuulka (haddii taasi aanay khatar ka weyn u horseedeyn).

## Dasaarad xaalad: Tallaabooyinka Lagu Difaacayo Macallimiinta ee Colombia

Macallimiinta Colombia ayaa waxaa si gaar ah u saamaysay colaad tobanaan sano socotay. Wasaaradda Waxbarashada ee dalkaasi ayaa sheegtay in macallimiinta ururada ka tirsan iyo kuwa aan ka tirsaneyn ee la dilay ay wadartoodu ahayd: 34 sanadkii 2009; 40 sanadkii 2010; 36 sanadkii 2011; iyo 30 sanadkii 2012.[42] Wasaaradda iyo hay'adaha kale ee dowladda ayaa ka wada shaqeeyay inay fuliyaan:

- ❑ Laga billaabo sanadkii 1989, dowladda iyo wasaaradda waxbarashada ayaa ansixiyay shuruuc[43] badan oo lagu nidaaminayo tallaabooyinka difaacidda macallimiinta;[44]
    - ❑ Wasaaradda Waxbarashada iyo shaqaalaha Waaxda Maamulka Waxbarashada ayaa ka qeyb qaatay guddiyo gaar ah si loo qiimeeyo khatarta ay wajahayaan macallimiinta, go'aanno looga gaaro tallaabooyinka ugu wanaagsan ee lagu difaaci karto macallin kasta. Guddiga ayaa ka baaraandegay xal kumeelgaar ah iyo mid joogta ah, iyo weliba haddii ay suuragal tahay waxa ay doonayaan macallimiinta khatarta ku jira;
    - ❑ Waxaa la gaaray heshiisyo u dhexeeya waaxaha si loogu ogolaado macallimiinta khatarta ku jira inay u wareegaan waax kale inta laga qiimeynayo khatarta ay wajahayaan;
    - ❑ Waxaa la sameeyay tallaabooyin dheeraad ah oo difaaca macallimiinta ah, sida in loo qeybiyay talefoonnada gacanta, halow-halow iyo jaakadaha aanay xabbada karin.[45]

## Tixgelinta ku aaddan difaaca muuqda ee waxbarashada

Waxaa muhiim loo arki karaa in difaac muuqda loo sameeyo waxbarashada goobaha khatarta badan; haseyeeshee tallaabooyinkaasi ayaa yeelan kara saamayn xun oo aan ula kaca ahayn.

• In ilaalo hubaysan la geeyo iskuullada ama la hubeeyo macallimiinta ayaa waxa ay xarunta waxbarashada ka dhigi kartaa mid u muuqata goob ciidan, sidaa darteedna la weerarri karo. Ilaalada aan hubaysneyn ayaa ka khatar yar, balse ma awooddaan inay iskuullada difaacaan xilliyada weerarrada. Qiimee faa'iidada iyo khasaarada uu leeyahay nooca ilaalada ka hor inta aadan go'aan ka gaarin.

• Hubaynta macallimiinta ayaa waxa ay kordhin kartaa cabsida ay qabaan ardada, waxaana ardada, macallimiinta iyo shaqaalaha waxbarashada ay khatar ugu jiraan inay ku dhacdo rasaas si aan ula kac ahayn u dhacday.

• Xoojinta dhismaha iskuulka ayaa ka dhigi karta mid soo jiita ciidamada iyo xooggaga hubaysan oo u adeegsan kara xarun hawlgal. Sida uu dhigayo Sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadannimada, u adeegsiga iskuullada ee ujeedooyin milateri ayaa ka qaadaysa maqaamkooda rayidnimo, waxaana ay ka dhigaysaa goobo milateri oo si sharci ah loo beegsan karo. Waxaa muhiim ah in xilli hore lala meel dhigo saraakiisha difaaca iyo kuwa ammaanka in iskuullada dhismahooda la xoojiyay laga difaacayo u adeegsiga ujeedooyinka milateri; iyo in la xaqiijiyo in taliyayaasha maxalliga ah ay go'aankan ixtiraami doonaan.

• Waxaa muhiim ah in la ogaado in taallaabooyinka difaaca muuqda ay xal u yihiin saamaynta mudada dhaw ama astaamaha colaadda. Waa in sida ugu macquulsan loogu daro tallaabooyinka wax looga qabanayo waxa dhaliyay colaadda, si looga hortago weerarro dheeraad ah, sida waxbarasho ay dadka wada heli karaan, manhaj nabada ku salaysan, luuqada waxbaridda, iyo siyaasadda shaqaaleysiinta macallimiinta (eeg bogga 27).

Waxaa intaa dheer in Tilmaanta 5 ee Tilmaamaha Ka Hortagga In Ciidamada Ay Iskuullada Iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Ay Dagaalladu Socdaan ayaa ka digaysa:

"Ma aha in askar ka tirsan dhinacyada ku lugta leh colaadda loo qorto inay sugaan ammaanka iskuullada iyo jaamacadaha, waa haddii ay jiraan dad kale oo hawshaas qaban kara. Haddii ay suuragal tahay, shacab si wanaagsan loo tababaray ayaa loo shaqaaleyn karaa sugidda ammaanka iskuullada iyo jaamacadaha. Haddii lagama maarmaan ay tahay, waxaa la tixgelin karaa in carruurta, ardada iyo shaqaalaha loo daadgureeyo meel ammaan ah."

## 3. Xaqiiji sii socoshada waxbarashada

### Tani maxay ka dhigan tahay?

Xaqiijinta sii socoshada waxbarashada ayaa ka dhigan in qaabab kala duwan loo fuliyo waxbarashada si ay ardada u helaan tacliin inkastoo uu hakad ku yimid noolasha caadiga ah. Qaababka bedelka ah ee waxbarashada loo fulin karo ayaa waxaa ka mid ah: bedelidda xarumaha waxbarashada, barnaamijta waxbarashada aan rasmiga ahayn, dedejinta fasallada waxbarashada, goobo kumeelgaar ah oo wax lagu barto, ama iskuullada guryaha. Waxaa xaaladaha gaar loo adeegsan karaa waxbarashada ay macallinka iyo ardayga kala fog yihiin.

### Maxay muhiim u tahay?

Waxbarashada ayaa hakad gasha marka iskuullada iyo xarumaha kale ee tacliinta la weerarro, ay wajahaan khatar weerar ama ay degaan dhinacyada hubaysan, marka macallimiinta iyo ardada ay iskuullada uga maqanaadaan cabsi ay ka qabaan weerar, ama waalidiinta ay carruurtooda kala baxaan iskuullada wadooyinka loo mara oo aan ammaan ahayn awgood. Saamaynta hakad kaasi ayaa qaadan karta bilo ama xataa sanado. Taa bedelkeeda, helitaanka waxbarashada ayaa muhiim ah maadaama ay yarayso hakad gelinta tacliinta, ayna ardada u sahli karto qaab ay uga kabtaan walwalka iyo niyad jabka.

### Qaabka loo samaynayo?

### Samee qorshayaal xakameyn ah oo lagu sii wadayo waxbarashada

➢ Samee qorshayaal xakameyn oo ah dhammaan heerarka wasaaradda si ay waxbarashada u sii socoto marka uu dhaco weerarka ama xarumaha waxbarashada loo adeegsado ujeedooyin milateri.
➢ U tixgeli qorshayaashan qaabab kale oo lagu fulin karo, isla markaana dooro qaabka ugu wanaagsan xaaladda taagan.
➢ Ku dar qorshayaasha xakameynta dowrka hay’adaha hawlwadaaga noqon kara, sida ku aan dowliga ahayn ee khibradda u leh qaababka bedelka ah ee loogu fuliyo waxbarashada.

### Tilmaan

Waxaa jira qaabab badan oo waxbarashada lagu sii wadi karo, kuwaasoo ay Wasaaradaha tixgelin karaan, kuna haboon xaalad kasta. Qaar ka mid ah ayaa la sii diyaarin karaa oo lagu dari karaa qorshayaasha xakameynta ama kuwa badqabka iskuulka. Faahfaahin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa dukumiintiga GCPEA ee Daraasadda Tallaabooyinka Deegaanka Ku Salaysan ee Waxbarashada Looga Difaacayo Weerarrada (2011) iyo midka Tallaabooyinka Iskuullada Ku Salaysan ee Waxbarashada Looga Difaacayo Beegsiga Weerarrada (2016).

## Isbarbar dhig faa'iidada, khasaaraha iyo helitaanka waxbarasho bedel ah, doorana kuwa ku wanaagsan xaaladdaada

| | |
|---|---|
| • Goobo bedel ah oo waxbarasho | Samee goobo bedel u ah waxbarashada haddii la weerarro xarumaha, ardada ama waxbarashada, ama ay khatar ugu jiraan weerar. Waxa ay noqon karaan xarumaha bulshada, iskuullada deriska ah, ama guryaha, waxaana bixin kara macallimiin mutadawiciin ah oo laga qoray deegaanka. |
| • Waxbarashada masaafada dheer | Bixi fursadaha waxbarashada masaafada ah si ay uga faa'iideystaan ardada aan aadi karin iskuullada cabsi ammaan awgeed ama kuwa iskuulkoodu ku burburay weerarrada. Qaar ka mid ah noocyada waxbarashada masaafada ee – lagu gudbiyo telefishinka, raadiyaha iyo internet-ka – ayaa u sahla ardada inay daawadaan ama dhagaystaan casharro la duubay ama toos ah, ka dibna waxa ay sameeyaan waxqabad ay isu direen ama si maxalli ah loogu fududeeyay. |
| • Gelinnada | Iskuulka u samee dhowr gelin. Xaaladaha ay ardada iyo shaqaalaha waxbarashada ku qasbaanaadeen inay ka guuraan iskuulladooda amni darro awgeed, bulshada deegaanka ayaa waxa ay iskuullada ka dhigi karaan laba gelin, si ay u caawiyaan ardada korortay. Iskuullada ayaa la dhigan karaa laba gelin oo kala ah subax iyo galab. |
| • Iskuullada xagaaga ama fasallada galabkii | Samee iskuullada xagaaga ama fasallada galabkii si ay uga faa'iideystaan ardada uu iskuulkooda mudada xirmay, tusaale ahaan ka dib khatar ku timid macallimiinta, qalalaasaha doorasho ama u adeegsiga saldhig milateri. |
| • Goobaha kumeelgaarka ah ee waxbarashada | U samee goobo kumeelgaar ah oo ay wax ku bartaan ardada la soo bedelay colaadda awgeed ama ay iskuulkooda adeegsanayaan xooggag hubaysan. Waxaa goobahaasi loogu talagalay inay ahaadaan fasallo muddo kooban ah, oo sida caadiga ah laga sameeyay waxyaabo kumeelgaar ah sida teendhooyinka |

### Daraasad xaalad: Adeegsiga waxbarashada raadiyaha lagu gudbiyo ee Soomaaliya[46]

Waxbarashada raadiyaha lagu gudbiyo ayaa u wanaagsanaan karta deegaannada aan dhaqaalaha fiican haysan, ammaankuna ku yar yahay. Mashruuca waxbarashada raadiyaha lagu gudbiyo ee Xarunta Hormarinta Waxbarashada (EDC) ay Soomaaliya ka fulisay intii u dhexeysay 2005 ilaa 2011, ayaa si joogta ah dadka ugu gudbinayay barnaamijyo ku saabsan qoraalka, aqrinta, xisaabta, xirfadaha noolasha, caafimaadka iyo ka hortagga colaadaha. Barnaamijtaasi oo maalin kasta socon jiray 3 saacadood ayaa todobaadkii shan maalmood laga baahin jiray mowjad FM ah, ayagoo gaari jiray qiyaastii in ka badan 300,000 oo canug. Waxaa casharrada bixinayay macallimiin maxalli ah. Sidoo kale, macallimiinta ayaa loo tababaray habka waxbarashada raadiyaha lagu gudbiyo, sida waxqabadka, sheekooyinka iyo heesaha laga baahin karo raadiyaha. Ka dib markii uu dhammaaday mashruucaasi sanadkii 2011, ayaa xarunta EDC waxa ay heshiis la gashay wasaaradaha waxbarashada ee Somaliland, Puntland, Koonfurta iyo Bartamaha (federaalka) iyo hay'ado kale, kuwaasoo ay u fasaxday inay adeegsadaan barnaamijtaasi iyo macluumaadkooda. Sida ay sheegtay xarunta EDC, wasaaradahaasi ayaa sii waday fulinta mashruuca.

## Daraasad xaalad: Waxbarasho bedel ah oo loo fidiyo ardada ku barakacday colaadda ee Nigeria

Hindisaha Badqabka Iskuullada (SSI)[47] ayaa waxaa sanadkii 2014 ku dhawaaqay wakiilka Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan waxbarashada caalamiga ah, Gordon Brown, iyo ganacsato Nigerian ah oo ka jawaabayay weerarrada ka dhanka ah waxbarashada ee ka dhaca gobollada waqooyi ee Nigeria (sida Adamawa, Borno, iyo Yobe) ee 2012[48] uu billaabay ururka Boko Xaraam. Si loo joogteeyo helitaanka waxbarashada ee carruurta ka barakacay colaadda ka taagan gobolladaasi, ayaa hay'adaha hawlwadaaga la ah SSI (sida DFID, UNICEF iyo wasaaradda waxbarashada) waxa ay sanadkii 2015 ka baaraandageen suuragalnimada fulinta dhowr tallaabo oo ay ka mid yihiin:

- In iskuullada deegaanno ammaan ah loo bedelo ardada dugsiyada sare ee meelaha ay colaaddu ka jirto;
- In kulamo xasaasi ah lala yeesho bulshooyinka deegaanka si loo ogaado awoodda ay u leeyihiin qaabilaadda ardada soo barakacday;
- In ardada soo barakacday lagu biiriyo barnaamijta caadiga ah ee iskuullada bulshada martigelisay;
- In iskuullada ay yeeshaan laba gelin, isla markaana la qoro macallimiin dheeraad ah;
- In iskuullo kumeelgaar ah laga sameeyo xeryaha barakacataasha gudaha ; iyo
- In si kooban loo bixiyo teendhooyin iyo qalabka waxbarashada si loo dhiirageliyo in ardada ay ku biiraan, kana sii mid ahaadaan waxbarashada xeryaha barakacayaasha gudaha.

## Tixgelinta ku aaddan fulinta waxbarashada bedelka ah

- Shaqaalee macallimiin cusub, mudnaantana sii kuwa aqoonta leh, balse sidoo kale qorshee in barayaashaasi ay dib ugu laabtaan hannaanka waxbarashada rasmiga ah.
- Maadaama waxbarashada bedelka ah loogu talagay inay socoto muddo kooban, waa in manhajka waxbaridda uu ahaadaa mid sida ugu macquulsan u waafaqsan hannaanka waxbarashada qaran, si looga baaqsado inuu waqtiga ka lumo ardada.
- In ardada iyo shaqaalaha waxbarashada laga soo raro goobaha khatarta ah iyo in la geeyo meel bedel ah ayaa si aan ula kac ahayn u abuuri karta inay bartilmaameed cusub u noqdaan weerar, maadaama ardada iyo macallimiinta oo dhan ay ku urursan yihiin hal goob.
- In bulshada soo barakacday loo sameeyo goobo waxbarasho oo kumeelgaar ah ayaa dhalin karta xiisad kala dhaxaysa bulshada martida loo yahay. Adigoo kaashaanaya xubnaha bulshada maxalliga ah, si joogta ah u qiimee isbedelka colaadda iyo badqabka fulinta waxbarashada bedelka ah. Waxbarashada bedelka ah ayaa inta badan waxaa fuliya hay'ado aan dowli ahayn, waxaana ay noqon kartaa mid leh manhaj gaar ah iyo imtixaannaad u gooni ah. Wasaaradaha ayaa wadashaqeyn la yeelan kara hay'adahaasi si loo xaqiijiyo in waxa ay ardada barayaan iyo qaabka loo imtixaamo ay waafaqsan yihiin hannaanka rasmiga ah, si ardada loogu fududeeyo inay sida ugu dhaqsaha badan dib ugu biiraan nidaamka rasmiga ah.

## 4. Taageer bulshooyinka

### Tani maxay ka dhigan tahay?

Taageerada Wasaaradda ee dowrka bulshada ayaa loola jeeda in la aqoonsado, la garawsado, awood loo yeelo, lala shaqeeyo iyo/ama dhaqaale la siiyo dhinacyada ka shaqeeya bulshada dhexdeeda si ay waxbarashada uga difaacaan weerarrada iyo in xarumaheeda loo adeegsado ujeedooyin milateri. Waxqabadka xubnaha bulshada ayaa waxaa ka mid noqon kara inay ka digaan in iskuullada loo adeegsado ujeedooyin milateri, inay dhinacyada dagaallamaya kala xaajoodaan sidii iskuullada looga dhigi lahaa goobo nabad ah, wadahadalada kale ee lala yeelanayo xooggaga hubaysan, inay sameeyaan kooxo u gaar ah difaaca carruurta, iyo inay mamnuucaan in iskuullada loo adeegsado arimaha doorashada ee usoo jiidi kara rabshadaha.

### Maxay muhiim u tahay?

Taageeridda dowrka bulshada ay ku leedahay difaaca waxbarashada ayaa muhiim ah maadaama xubnaha bulshada ay inta badan awoodaan inay degdeg u jawaab-celiyaan, fahansan yihiin xaaladda maxalliga ah, ayna ka go'an tahay inay difaacaan waxbarashada carruurtooda. Dadka ku hawlan arinkan ayaa u arka in tallaabooyinka bulshada dhexdeeda ah ay ka mid yihiin qaababka ugu wanaagsan ee waxbarashada looga difaaci karo weerarrada.[49]

### Qaabka loo samaynayo?

### Ku dar qiimeynta iyo kormeerka Wasaaradda tallaabooyinka difaaca ee maxalliga ah

- Ururi macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan qaababka ay bulshada maxalliga ah waxbarashada uga difaacdo weerarrada iyo in xarumaheeda loo adeegsado ujeedooyin milateri.
- U adeegso macluumaadkaasi samaynta iyo xoojinta istaraatijiyado hal-abuur ah oo ku haboon difaaca waxbarashada.
- Ka fikir qaababka lagu faafin karo ama lagu xoojin karo tallaabooyinka maxalliga ah ee difaaca waxbarashada, ayadoo lagu darayo barnaamijta heer gobol iyo heer qaran.

### Samee barnaamij dhaqaalo oo looga hortagayo, la isugu diyaarinayo, loogana jawaabayo weerarrada ka dhanka ah waxbarashada

Marka ay dhacaan weerarrada ka dhanka ah iskuullada, inta badan waxaa jawaabta ugu horraysa bixiya bulshada maxalliga ah. Wasaaraddu waxa ay xoojin kartaa jawaabtaasi ayadoo u samaynayso barnaamij dhaqaale.

- Samee ama la shaqee hay'adaha samayn kara barnaamij dhaqaalo oo heer qaran ah kaasoo kharash ku bixiya xafiisyada maxalliga ah si looga hortago, loo yareeyo khatarta ama looga jawaab-celiyo weerarrada.[50]
- Xaqiiji in barnaamijka dhaqaalaha qaran uu yahay mid si sahlan looga fulin karo deegaannada oo dhan.
- U ogolow mas'uuliyiinta heer degmo iyo xubnaha bulshada ay dhibaatadu gaartay inay go'aansadaan qaabka ugu wanaagsan ee looga jawaab-celin karo weerarrada.
- U adeegso barnaamijka dhaqaalaha si loo hormariyo qaab maxalli ah oo si hal-abuur ah loogu difaaco waxbarashada, sida tiknoolajiyadda taageerta hannaanka digniinta hore, ama fulinta waxbarashada bedelka ah.
- Haddii aanay suuragal ahayn in si degdeg ah dayactir loogu sameeyo iskuulka, waxaa dhaqaalaha loo adeegsan karaa in lagu dhiso iskuul cusub, waxbarashada lagu baahiyo raadiyaha/telefishinka, iskuullada guryaha ku yaal, kuwa xilliyada xagaaga, iyo goobaha sida kumeelgaarka ah wax loogu barto.
- Ha u adeegsan barnaamijka dhaqaalaha inaad ku bedesho jawaab-celinta heer qaran, ama aad mas'uuliyadda difaaca waxbarashada faraha uga qaado bulshada oo keliya.

## Taageer guddiyada difaaca iskuullada

➢ Abaabul—ama la shaqee hay'adaha abaabuli kara— guddiyada difaaca iskuullada (oo ay ka mid yihiin wakiillo ka socda qeybaha kala duwan ee bulshada) si ay u noqdaan kuwa u doodda arimaha ay ka midka yihiin xuquuqda carruurta, difaaca waxbarashada, iyo in dib loo billaabo waxbarashada joogsatay.

- Gaarsii siyaasadaha iyo hagidda heer qaran, gobol iyo iskuul ee ku aaddan qiimeynta iyo kormeerka socda ee khatarta, gaar ahaan weerarrada ka dhanka ah waxbarashada iyo in xarumaheeda loo adeegsado ujeedooyin milateri.
- Shardi uga dhig guddiga maamulka iskuulka inuu bulshada ka qeybgeliyo qiimeynta iyo dusha kala socoshada weerarrada ka dhanka ah waxbarashada si ay qeyb uga noqdaan qorshayaasha ammaanka iyo badqabka.

➢ Shardi uga dhig —taageerna— in guddiyada difaaca iskuullada ay diyaariyaan, isla markaana fuliyaan qorshayaasha ammaanka iyo badqabka ee ay ka midka yihiin weerarrada ka dhanka ah iskuullada iyo in lo adeegsado ujeedooyin milateri.

- U tababar maamulayaasha waxbarashada maxalliga ah dib-u-eegista qorshayaasha jira ee ku aaddan ammaanka iyo badqabka iskuullada, si loo hubiyo inay ku jiraan ka difaaca waxbarashada weerarrada iyo in xarumaheeda loo adeegsado ujeedooyin milateri, iyo in go'aan laga gaaro isbedellada loo baahan yahay.
- Taageer hannaan kormeer oo lagu xaqiijinayo in qorshayaasha la cusboonaysiiyay, ay muhiim yihiin, isla markaana la hirgeliyay.
- Xaqiiji isku xirka qorshayaasha bulshada ee waxbarashada iyo kuwa yareynta khatarta ama xaaladaha degdega ah.

### Tilmaan

Marka aad diyaarinayso hagaha qaran ee qorshayaasha badqabka iskuullada ee muhiimka u ah weerarrada iyo adeegsigooda, tixgeli inaan ku darto qaabka:[51]

- ❑ Qeex waxyaabaha ka dhigan "weerarrida waxbarashada" iyo "u adeegsiga iskuullada ujeedooyin milateri," si loogu isticmaalo qorsheynta iyo ka warramidda;
- ❑ Aqoonso xaaladaha suuragalka ah, tusaale ahaan: "Haddii koox hubaysan ay soo gasho iskuulka oo ay rasaas furto markaasi…" "Haddii koox hubaysan ay dalbato inay adeegsato iskuulka…" waana inay xigaan tilmaamo qeexan oo ku aaddan hawsha cid kasta;
- ❑ Kala caddee dowrka iyo mas'uuliyadda saaran macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada;
- ❑ Diyaari hannaanka xiritaanka iyo daadgureynta iskuulka;
- ❑ La samee bulshada iskuulka tijaabooyin ku aaddan waxa ay falayaan haddii ay dhacaan noocyada kala duwan ee weerarrada ama iskuulka loo adeegsado ujeedooyin milateri (iyo xaaladaha musiibooyinka dabiiciga ah/yareynta musiibooyinka);
- ❑ Aqoonso goob laga hago hawlgallada degdega ah ee heer degmo, halkaasoo laga agaasimi karo ka jawaab-celinta weerarrada;
- ❑ Xaqiiji goob ay dib ugu midoobi karaan ardada iyo waalidiintood;
- ❑ Samee qaab lagu tira koobi karo ardada, macallimiinta, iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada;
- ❑ Diyaari qalabka gurmadka degdega ah (sida kan gargaarka degdega ah, dab damidka); iyo
- ❑ Samee borotokool isgaarsiin oo ka dhexeeya iskuullada, Wasaadaraha, hay'adaha kale ee dowladda iyo kuwa samafalka.

## Daraasad xaalad: Barnaamijka Yareynta Musiibooyinka ee Falastiin[52]

Sanadkii 2011, Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ayaa kaashatay hay'adda UNESCO si ay Gaza uga fuliso Barnaamijka Yareynta Musiibooyinka kaasoo looga gol lahaa in iskuullada nugul laga dhigo kuwo ammaan ah ayadoo la adeegsano qaabab la isu geeyay. Wasaaradda ayaa si gaar ah u adeegsatay mabda'a iyo ficilka wanaagsan ee yareynta khatarta musiibada ee xaaladaha colaadda, gaar ahaan tan ka jirta Gaza. Waxaa ka mid ahaa tababarka hawlwadeennada waxbarashada. Mawduucyada tababarka waxaa ku jiray:

- Adeegsiga Heerarka Ugu Hooseeya ee Waxbarashada Xaaladaha Degdega ah ee INEE;[53]
- Fulinta taageerada maskaxeed, gaar ahaan: ciyaaraha, muujinta dareenka iyo xirfadaha noolasha;
- Wax ka qabashada xaaladaha degdega ah;
- Isu diyaarinta xaaladaha aan la hubin;
- Fulinta gargaarka degdega ah (ayadoo la kaashanayo Bisha Cas);
- Garashada iyo wax ka qabashada walxaha laga shakiyo;
- Deminta dabka;
- Garashada iyo wax ka qabashada khatarta korontada;
- Isu diyaarinta difaaca madaniga ah;
- Qaadashada iyo adeegsiga qalabka badbaadada (sida dab demiska, matoorrada korontada dhaliya, makarafoonnada, dareeska xubnaha guddiga badbaadada, qalabka digniinta si iskuulka loogu wargeliyo weerar kusoo wajahan); iyo
- Adeegsiga qaabka digniinta ee fariinta gaaban.

Arinta kale ee looga hadlay barnaamijkaasi ayaa ahayd aqoonsiga iyo taageeridda istaraatijiyadaha maxalliga ah ee lagu difaacayo waxbarashada, sida kuwa soo socda:

- ❑ Waalidiinta oo subixii waca macallimiinta si ay u ogaadaan in wadada loo marayo iskuulka ay ammaan tahay;
- ❑ Carruurta oo adeegsada wadooyin la isla ogyahay marka ay tagayaan ama kasoo laabanayaan iskuulka;
- ❑ In iskuullada khatarta ugu jira weerarka aan loo adeegsan in lagu qaado imtixaannada sanad dugsiyeedka; iyo
- ❑ In carruurta laga joojiyo ka qeybgalka arimaha sida weyn u muujin kara (sida tartannada ciyaaraha ee ka dhaca goobaha bannaan, iwm) kuwaasoo usoo jiidi kara weerarr."

## Dhis awoodda bulshada

In bulshadda ay si wax ku ool ah oo la joogteyn karo uga qeyb qaadato ka difaaca waxbarashada weerarrada ayaa u baahan in si heer sare ah loo dhiso awooddeeda, iyo ballanqaad laga helo xubnaha bulshada.

➢ Samee wacyigelin dadweynaha ah, tusaale ahaan adigoo adeegsanaya olole qaran oo ku saabsan mowduucyada khuseeya sida: muhiimadda waxbarashada; dib ugu laabashada iskuullada markii hore ku xirmay colaadda; iyo in iskuulladu yihiin kuwo la ilaaliyay oo ka baxsan colaadda.

➢ Dhis awoodda bulshada— ama la shaqee hay'adaha dhisi kara — ee ku aaddan mowduucyada difaaca ee ay ka midka yihiin:

- Dusha kala socoshada iyo ka warramidda tacaddiyada ka dhanka ah xuquuqda carruurta iyo tan ban'aadanka;
- Waxa ay ka dhigan yihiin weerarrida waxbarashada iyo u adeegsiga ujeedooyinka milateri;
- Diyaarinta qorshayaal xakameyn oo ku salaysan iskuullada loogana hortagayo weerarrada iyo u adeegsiga ujeedooyinka milateri;
- Adeegsiga Heerarka Ugu Hooseeya ee Waxbarashada Xaaladaha Degdega ah ee INEE;

- Qaababka taageerada maskaxeed;
- Qaabab bedel ah oo wax lagu baranayo marka iskuulladu xirmaan;
- U ololeynta iyo xoojinta xuquuqda waxbarashada;
- Ka hortagga tacaddiyada muuqda iyo kuwa galmada, qoroshada carruurta ee dhinacyada hubaysan;
- Qaabka iyo qofka loo gudbinayo kiisaska xadgudubka ah;
- Nidaamka digniinta hore (rasmi iyo aan rasmi ahayn, sida macallimiinta oo farriin telefoon u qora waalidka);
- Gargaarka degdega ah;
- Daadgureynta iskuulka;
- Badqabka iskuulka; iyo
- Wehlinta ardada iyo macallimiinta marka ay u socdaan iyo marka ay ka imanayaan iskuulka, iwm.

## Daraasad xaalad: Ka Qeybgelinta Bulshada Cote d’Ivoire Xakameynta U Adeegsiga Iskuullada Ujeedooyin Milater

Intii ay socdeen rabshadihii ka dhashay doorashadii Cote d’Ivoire ee dhacay dabayaaqadii 2010 ilaa bartamihii 2011, ayaa waxaa la boobay iskuullada, waxaana guryo, keyd hub iyo xabaal wadareedyo[54] ka dhigtay ciidamada dowladda iyo xooggaga kale ee hubaysan. Sida ay sheegtay kooxda waxbarashada caalamiga ah, sanadkii 2011 ayaa mas’uuliyiinta waxbarashada ee heer gobol, xubno ka tirsan guddiyada maamula iskuullada iyo kuwa ilaaliya xuquuqda carruurta waxa ay iska kaashadeen sidii ay iskuullada uga difaaci lahaayeen u adeegsiga ujeedooyinka milateri markii ay sii xumaadeen rabshadihii dhacayay 2010 ilaa 2011. Ayagoo kaashaanaya ilaalo ka tirsan booliska iyo milateriga Qaramada Midoobay, ayaa kooxahan waxa ay booqdeen 20 ah baraha koontoroolka ee milateriga iyo 14 iskuul si ay dhinacyada dagaallamaya u dareensiiyaan saamaynta ay colaadda ku yeelatay carruurta.[55] Arimaha ay kala hadleen ayaa waxaa ka mid ahaa fahanka Sharciga Caalamiga ah ee Bani’aadannimada iyo qaraarrada Golaha Ammaanka ee tirsigoodu yahay 1612 iyo 1998.[56] Taasi ayaa dhalisay in taliyayaasha ciidamada dowladda ay ogolaadaan inay todobaadkiiba mar la kulmaan mas’uuliyiin ka socota ilaalinta xuquuqda carruurta, ayna dib-u-eegis ku sameeyaan warbixinnada ku aaddan u adeegsiga iskuullada ujeedooyinka milateri. Xooggaga hubaysan ayaa ka guuray afartan ka mid ah shan iyo afartankii iskuul ee ay ku sugnaayeen.[57]

## Taageer wadaxaajoodka bulshadu ku difaacayso waxbarashada

Wasaaraddu waxa ay ka taageeri kartaa bulshada maxalliga ah inay kala xaajooto dhinacyada deegaanka oo ay ka midka yihiin kuwa hubaysan si loo sameeyo waxyaabo la isku waafaqsan yahay oo ku aaddan hab dhaqanka laga aqbali karo gudaha iskuullada. Heshiiska ka dhasha wadaxaajoodkaasi ayaa yeelan kara magacyo badan sida: heshiis nabadeedka goobaha xurmeysan, bayaanka deegaanka nabada, hab dhaqanka iskuullada, ama deegaan ka caaggan colaadda.

➢ Sare u qaad fahanka shaqaalaha Wasaaradda ee (heer qaran, gobol, degmo iyo iskuul) ee ku aaddan wadaxaajoodka ay bulshada lala leedahay dhinacyada hubaysan iyo mabda'a in iskuulku yahay goob nabadeed.

➢ U tababar shaqaalaha Wasaaradda ee maxalliga ah marxaladaha wadaxaajoodka, iyo sida ay bulshada uga gacan siin karaan marxalad kasta, Tusaale ahaan:

a Sare u qaadka wacyiga bulshada ee ku aaddan baahida loo qabo difaaca waxbarashada iyo hannaanka wadaxaajoodka;

b Kala xaajoodka dhinacyada ku sugan deegaanka hab dhaqanka lagu heshiiyay in laga samayn karo gudaha iskuullada;

c Qoridda heerarka difaaca ee lagu heshiiyay ama "hab dhaqanka" (Eeg daraasadda ku taal bogga 27);

d Ansixinta nuqulka qabyada ah ayadoo laga qeybgelinayo xubno kala duwan oo bulshada ah; iyo

e In si shaac baxsan oo heer bulsho ah loogu dhawaaqo in iskuulladu yihiin goob ka caaggan colaadda.

➢ U fidi taageero siyaasadeed oo heer wasaaradeed ah, oo martigeli kana qeyb qaado shirarka bulshada ee guddiga difaaca waxbarashada, iyo shaacinta in iskuulladu yihiin goobo ka caaggan colaadda.

### Tilmaan

Tallaabooyinka ay qaadaan bulshooyinka ayaa fulin kara waxqabadka u degsan Wasaaradda, waxaana ay dowr muhiim ah ka ciyaari karaan difaaca waxbarashada. Si aad faahfaahin buuxda uga hesho qaabka ay bulshooyinka u wanaajin karaan ammaanka iyo difaaca waxbarashada eeg dukumiintiga GCPEA ee Dowrka Bulshooyinka ee Ka Difaaca Waxbarashada Weerarrada: Casharrada La Bartay (GCPEA, 2014).[58]

## Case Study: Learning Institutions as Zones of Peace Declaration in the Philippines

Mindanao Peoples Caucus

# DECLARATION of LEARNING INSTITUTIONS as ZONES of PEACE

Datu Gumbay Elementary School
Barangay Buayan, Datu Piang Municipality, Maguindanao

BALAY

unicef

| DECLARATION of PRINCIPLES | CODE of CONDUCT |
|---|---|
| 1. No bringing of guns in the premises of the school to avoid possible encounters and threat to children | • Negotiation/dialogue that there should be no AFP posts or other armed groups within the premise of the school<br>• Coordinating Committee on Cessation of Hostilities (CCCH) to facilitate the above conduct on respective individuals/groups<br>• Setting of "corrective measures" to impose for the violation of code herein<br>• Barangay Council to initiate action in acquiring for Barangay legislation through "ordinance" |
| 2. Enforce strict security & protection of declared zones of peace | • Parents Teacher's Association (PTA) with school authorities to campaign on the whole community to observe clean environment on the premise of declared zone<br>• Parent Teacher's Association (PTA) with other parents in the community to orient & discipline children not to enter the school premise especially the declared zone of peace during off classes and/or holidays<br>• Parent Teacher's Association (PTA) with Department of Education & Barangay Local Government Unit discretion to impose corrective measures in case anyone may found responsible to cause any form of destruction on declared zone<br>• Barangay Local Government Unit to facilitate the campaign/advocacy on community in prohibiting any residents in tying their raised animals to enter into Learning Institutions especially the declared zone that may possibly cause destruction<br>• Barangay Council to strengthen the campaign for strict security & protec tion through legislating of a Barangay ordinance |
| 3. Protection of Learning Institution in times of emergencies (conflict cum displacement) | • Advocating on setting Learning Institution's as the "last option" to be use as evacuation center during emergencies/displacement to avoid destruction of facilities & buildings<br>• In response to above mentioned conduct, constructing of evacuation center where the evacuees stay during emergencies or displacement<br>• In case of massive displacement and occupying Learning Institution is indispensable, Parent Teacher's Association (PTA) with Department of Education and Barangay Local Government Unit to initiate action tantamount to protection of school facilities & buildings through monitoring the status of LI time to time & storing the facilities to safe place<br>• Conduct of skilled training for community on disaster risk reductions (DRR) |
| 4. Provision of expressed and continuous support to education issues such as need for renovation of school buildings, insufficient school facilities (table & books), books, status of volunteer teachers & allocation of fund to grant increase honorarium for day care teacher & uztadzes | • Lobbying or establishing of referrals to raise such education issues to concerned agencies/institutions responsible for providing of solution thereof |
| 5. Policy on alleviating the number of out-of-school-children or out-of-school youth (OSC/OSY) | • Department of Education personnel with Parent Teacher's Association (PTA) to campaign/advocate for the importance of education through leaf letting activities, symposiums on school to school |
| 6. Policy on mitigating/reducing the number of minor in engaging to adult activities such as being included in labor force as "pedi cab and/or tricycle drivers and traders" | • Department of Education with Barangay Local Government Unit to campaign the importance of education to all the parents regarding the importance of education (house-house or communal gathering)<br>• Organizing the parents of the minors whom are engaging in labor force as pedicab or tricycle drivers and traders & provide livelihood assistance for them to have enough resources to send or resend their children to schools<br>• Organizing of the minor and bring their interest to schooling |

## Tixgelinta ku aaddan taageerada ay Wasaaraddu siiso wadaxaajoodka bulshada ee difaaca iskuullada

Wasaaraddu waxa ay bulshada ka taageeri kartaa qiimeynta xaaladda colaadda, ayadoo xaqiijinaysa in fududeeyayaasha saxda ah, xubnaha bulshada iyo wakiillo ka socda dhinacyada hubaysan ay ka qeyb qaataan. Marka sidaa aad samayneyso, ka taxadar:

- Aragtidu waa muhiim. Aragtida laga qabo qofka fududeynaya wadaxaajoodka ayaa waxbadan ka taraysa cidda doonaysa inay ka qeybgasho. Mararka qaar, waxaa wanaagsan in qofku yahay mid fahansan xaaladda maxalliga ah ee  colaadda. Waxaa jirta marar la doorbido dhexdhexaadiye caalami ah, maadaama uu yahay qof bannaanka ka taagan colaadda oo aan dhinacna la safneyn. Adigoo ka duulaya qiimeynta colaadda, kala shaqee bulshada sidii loo heli lahaa fududeeye fahansan colaadda, isla markaana haysta kalsoonida dhammaan dhinacyada qeybta ka ah wadaxaajoodka.
- Waa in khatarta la taxliilayaa oo la maareeyaa. Waxaa jira khatar soo wajihi karta fududeeyaha wadaxaajoodka iyo kuwa ka qeyb qaadanaya. Ka hor inta aadan bulshada ka taageerin wadaxaajoodka, kala shaqee ururinta macluumaad ku aaddan colaadda iyo dhinacyada ku lugta leh, si loo xaqiijiyo in wadaxaajoodka aanu si aan bareer ahayn u noqon mid weerar lala beegsado.
- Ku dhawaaqidda in iskuulka uu yahay goob nabadeed ayadoo aan lagala xaajoon hogaamiyayaasha siyaasadda iyo dhinacyada hubaysan ee maxalliga ah, ayaa sare u qaadi karta magaca iskuulka, waxaana kordheysa suuragalnimada ah in lala beegsado weerar. Ku dhiirageli bulshada inay marto dhammaan marxaladaha wadaxaajoodka si loo gaaro heshiis waara.
- Waxaa jira xilliyo uusan wadaxaajoodka habooneyn. Waxaa suuragal ah in dhinacyada hubaysan ay kala daadsan yihiin, oo ay adag tahay in lagula xisaabtamo heshiiska ay galeen. Gaaridda heshiis durbadiiba burbura ama aan lahayn isla xisaabtan ayaa wiiqi kara hannaanka wadaxaajoodka. Sidaa awgeed, ka taageer bulshada inay qiimeyso nooca xooggaga hubaysan ka hor inta aanay la billaabin wadaxaajood.
- Wadaxaajoodka ayaa sidoo kale sharciyad u samayn kara dhinacyada hubaysan ee aan dowliga ahayn. Marka la qiimeynayo colaadda, waa in bulshada laga taageeraa xaqiijinta in sharciyad u samaynta noocan ah aanay dhalin iska horimaad ka dhex abuurma xooggaga kala duwan.
- Ugu dambeyn, waa in taageerada Wasaaradda ee ku aaddan wadaxaajoodka ay bulshada ka yeelanayso weerarrada ka dhanka ah waxbarashada, aysan noqon qaab mas'uuliyadda badqabka iskuullada loogu wareejinayo bulshada; balse waa inay noqoto mid kaabaysa dadaalka Wasaaradda ay ku difaacayso waxbarashada.

# 5. Dareensanow colaadda

## Tani maxay ka dhigan tahay?

In Wasaaraddu ay noqoto mid dareensan colaadda ayaa waxaa loola jeeda inay isbedel ku samayso siyaasadaha iyo barnaamijta si ay u yareeyaan inay gacan ka geystaan hurinta colaadda oo ay kordhiyaan taageeridda nabada.

## Maxay muhiim u tahay?

Waxbarashada ayaa keenta aqoon, dabci iyo hab dhaqan kuwaasoo noqon kara awood ballaaran oo dhalisa isbedel bulsho oo horseeda nabad— ama dagaal. Hirgelinta barnaamij iyo siyaasado waxbarasho kuwaasoo yareynaya xiisadda u dhexeysa ururada, kordhinaysana isu soo dhawaanshaha mujtamaca ayaa qeyb ka qaadata dhisidda nabada, waxaana suuragal ah inay yareyso weerarrada ka dhanka ah waxbarashada iyo in xarumaheeda loo adeegsado ujeedooyin milateri.

## Qaabka loo samaynayo?

## Dib-u-eegis ku samee siyaasadaha iyo barnaamijta jira ee waxbarashada si ay u dareemaan colaadda

➢ Dib-u-eegis ku samee siyaasadaha iyo barnaamijta qaran ee jira iyo kuwa la filayo si loo ogaado qaabkooda iyo inay ku lug leeyihiin colaadda, nabada ama labadaba.
➢ Dib-u-eegis ku samee siyaasadaha iyo barnaamijta dareensan colaadda ee sida tooska ah ama dadban uga qeyb qaata difaaca waxbarashada, gaar ahaan kuwa khuseeya:

- Hab-dhaqanka macallimiinta;
- Luuqada wax baridda;
- Aqoonsiga iyo isku bedelka imtixaannaadka;
- Shaqaaleynta macallimiinta, xulashada iyo mushaarsiintooda; iyo
- Manhajka, buugaagta iyo qalabka kale ee waxbarashada.

## Kalsooni ka dhex abuur Wasaaradda iyo bulshooyinka iskuullada

➢ Xooji xiriir is-aaminaad oo dhexmara shaqaalaha Wasaaradda ee heer qaran/maxalli ah, iyo bulshooyinka iskuullada, ayadoo lagala tashanayo wakiillo ka kala socda qeybaha bulshada qaabka ugu wanaagsan oo lagu difaaci karo waxbarashada. Ka qeybgali:

- Rag iyo dumar ka socda dhaqamada, beelaha iyo diimaha kala duwan;
- Rag iyo dumar ka socda deegaanno kala duwan;
- Macallimiin;
- Arday (carruur, dhalinyaro, iyo dad waaweyn);
- Waalidiin iyo xubnaha bulshada;
- Shaqaalaha gargaarka iyo hormarinta;
- Xubno ka socda Kooxda Waxbarashada iyo ururada kale ee waxbarashada
- Shaqaalaha hay'adaha aan dowliga ahayn;
- Dadka nabada ka shaqeeya; iyo
- Khubarada Yareynta Musiibooyinka.

➢ Si cad oo joogta ah ugu sheeg bulshada maxalliga ah qorshaha Wasaaradda ee ku aaddan ka hortagga weerarridda waxbarashada iyo in xarumaheeda loo adeegsado ujeedooyin milateri.

## Samee manhaj dareensan colaadda

➢ Samee guddi loo dhan yahay oo baara haddii uu jiro xiriir ka dhexeeya manhajka, luuqada waxbaridda, colaadda iyo weerarrada ka dhanka ah waxbarashada.

➢ Isbedel ku samee manhajka si waxyaabaha ku jira aanay u dhalin iska horimaad bulshada dhexdeeda ah, dhaqan rabsho, ama faquuq.

➢ Xooji in manhajka uu qeyb weyn ka qaato bulsho nabad ah, ayadoo lagu darayo mowduucyada sida:

- Fikirka wax ku oolka ah;
- Ka hortagga colaadda;
- Nabad ku xallinta colaadda;
- Waxbarashada nabada;
- Xuquuqda bani'aadanka;
- Sharciga iyo falalka bani'aadannimada;
- Xurmeynta kala duwanaanshaha; iyo
- Wadaniyad mas'uuliyad leh.
- Waxaa intaa dheer, ku dar manhajka xog iyo muuqaalo matalaya dhammaan qeybaha kala duwan ee bulshada, kana saar kuwa ka eexanaya qeyb ka mid ah bulshada.

### Tilmaan

Wasaaraddu waxa ay buugaagta qaranka ama kuwa dheeraadka ah ku dari kartaa mowduuc ku saabsan nabad dhiska, kaasoo loo diyaariyay qaab ay macallimiinta ku bari karaan xaalado adag, ayagoo aan lahayn tababar badan. Si aad faahfaahin dheeraad ah u hesho, eeg: Badqabka, Adkeysiga iyo Isku-duubnida bulshada: Tilmaamaha Manhajka (PEIC, UNESCO-IIEP iyo IBE, 2015).[59]

Haddii fursad loo hayo barnaamij waxbarashada nabada oo maxalli ah, kaasoo u baahan in macallimiinta loo fidiyo tababar ballaaran iyo taageero, waxaa jira macluumaad ku diyaarsan internetka, tusaale ahaan:

- ❑ Barashada Wada Noolaanshaha: Waxbarashada Xallinta Khilaafaadka, Wadaniyad Mas'uuliyad leh, Xuquuqda Aadanaha iyo Dhaqanka Bani'aadannimada (PEIC, 2013)[60]
- ❑ Barnaamijka Waxbarashada Nabada ee Hay'adaha: Xirfadaha Tababarka Noolasha Wax ku oolka ah (UNHCR, UNESCO iyo INEE, 2005)[61]
- ❑ UNICEF iyo Wasaaradda Waxbarashada Sierra Leone, Arimaha Soo Baxaya (barnaamijka tababarka macallinka) (UNICEF, 2008)[62]

## Samee luuqada waxbaridda oo dareensan colaadda

Ka fogow siyaasadaha ama barnaamijta luuqadaha waxbaridda ee dhalin kara rabshadaha ka dhanka ah dowladda iyo/ama iskuulka.

➢ Samee guddi ka shaqeeya baaritaan lagu ogaanayo xiriirka ka dhexeeya siyaasadda luuqada qaran ee waxbaridda, colaadda iyo weerarrada ka dhanka ah waxbarashada.[63]

➢ Tixgeli siyaasadda ayadoo lagu salaynayo waxyaabaha lagu ogaaday kormeerka iyo qiimeynta, iyo baahida ay qabaan ardada kala duwan.

➢ Qiimee saamaynta ay qeybaha kala duwan ee bulshada ku yeelan karaan siyaasado kala gedisan oo ku aaddan luuqada waxbaridda, sida:

- In luuqadooda hooyo wax lagu baro ardada fasallada hoose, haddii la awooddana fasallada sare;
- In haddii ay suuragal tahay luuqado dhowr ah wax lagu baro barakacayaasha iyo bulshada martigelisay, marka luuqada waxbaridda ay kala duwan tahay;
- Siyaasado baahsan, oo xafiisyada gobollada ay go'aan ka gaaraan siyaasadda luuqada waxbaridda; iyo
- In wax lagu baro luuqad labaad oo cusub ama la hormariyay, si loo helo dad badan oo la shaqaalaysiin karo.

## Samee barnaamij iyo siyaasado dareensan colaadda oo lagu xallinayo sinnaan la'aanta helidda waxbarashada[64]

Sinnaan la'aanta helidda waxbarashada ayaa xiisad ka dhex abuuri karta dhinacyada bulshada, shacabka iyo dowladda. Marka iskuullada loo arko inay qeyb ka yihiin dowladda, taasoo loo qabo tabasho, ayaa waxa ay u nuglaan karaan weerar. Barnaamijta iyo siyaasadaha dareensan colaadda ayaa ujeedkoodu yahay in lagu yareeyo sinnaan la'aanta helitaanka waxbarashada iyo hormarinta in dhammaan dhinacyada bulshada ay si isla eg u helaan tacliinta.

➢ Qiimee xiriirka ka dhexeeya helitaanka waxbarashada iyo colaadda ee xaaladaha gaarka ah.

➢ Diyaari qorsho hormar leh oo lagu fulinayo siyaasad colaadda dareensan taasoo xoogga saaraysa in dhammaan dhinacyada bulshada ay si siman u helaan heerarka kala duwan ee waxbarashada.

➢ Xal u hel caqabadaha dhanka maamulka ah ee hortaagan ku biiritaanka iskuulka, sida: aqoonsi la'aanta tacliintii hore ama waxbarashada aan rasmiga ahayn; shuruud ah in la keeno dukumiintiyada iskuulkii hore; warqadaha dhalashada; in qofka waxbarashada loogu diido da'diisa awgeed

➢ Meesha ka saar caqabadaha dhaqaalaha, tusaale ahaan dhimidda/laalidda lacagta waxbarashada iyo/ama bixinta deeq waxbarasho ama lacago taakuleyn ah oo shardi leh.

➢ Hirgeli hannaan lagu hubinayo guulaha waxbarasho ee ay ardadu ka gaareen dal kale, tusaale ahaan ardada qaxootiga ah ama kuwa dalkooda kusoo laabtay qaxootinnimo ka dib.

➢ Bixi fursado waxbarasho oo loo dhan yahay, ayna heli karaan dhammaan dadka, gaar ahaan kooxaha ku hadla luuqada gaarka ah, qaxootiga, barakacayaasha iyo ardada lixaadkoodu kala dhiman yahay.

➢ Meesha ka saar takoorka diwaangelinta, ama qalinjabinta, isla markaana aqoonso oo shahaado la heer ah sii ardada soo martay waxbarashada qaxootiga.

## Macallimiinta u shaqaaleysii, u xulo, oo u hawlgeli qaab dareensan colaadda

Heybta macallimiinta, qaabka lagu xushay iyo dowrka ay ku leeyihiin bulshada ayaa dhammaantood dhalin kara colaad iyo weliba weerarro. Si looga hortago dhibaatadaasi, tixgeli tallaabooyinka soo socda:

➢ Qaad tallaabooyin hormar leh oo lagu xaqiijinayo in mas'uuliyiinta sare ee Wasaaradda ay ka kooban yihiin rag iyo dumar matalaya qeybaha kala duwan ee bulshada, iyo in isku dhafka shaqaalaha xafiisyada maxalliga ah ee Wasaaradda uu yahay mid haboon.

➢ Ayadoo la adeegsanayo siyaasad heer qaran ah, diyaari barnaamij qaran oo ku aaddan shaqaaleysiinta waaxda waxbarashada:

- Si aan takoor lahayn u xayeysii shaqada la doonayo iyo qaabka xulashada;
- Hirgeli guddi xulasho oo xubnihiisu ay kala duwan yihiin;
- Ha noqdo hannaanka xulashada mid hufan; iyo
- Ku xulo macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada oo ku salee shaqada la xayeysiiyay iyo fahankooda ku aaddan colaadda.

➢ Isbedel ku samee tababarka diyaarinta macallimiinta ee ka hor inta aanay shaqada billaabin iyo inta ay shaqeynayaan si loo dhiso awooddooda fahanka colaadda (eeg sanduuqa hoose), macallinnimada iyo manhajka, si qaababka wax bariddooda aanay u horseedin colaad.

➢ Si cadaalad ah oo hufan uga hawlgeli macallimiinta dhammaan gobollada, dhiiragelinna u samee kuwa ka shaqeynaya goobaha adag, gaar ahaan kuwa awoodda inay casharrada ku bixiyaan luuqada hooyo.

➢ Samee oo hirgeli waaxda shaqaaleysiinta oo sinnaan ku dhisan iyo nidaam mushaar bixin.

### Tilmaan

Macallinka dareensan colaadda:[65]

- Waxa uu fahansan yahay colaadda, waxa dhaliyay, dhinacyada kala duwan, iyo baahida loo qabo in isbedel lagu sameeyo;
- Waxa uu ogyahay in waxbarashada oo la wada helo ay tahay xuquuq aadanuhu leeyahay;
- Waxa uu ogyahay eexda ku jirta iyo sida ficilkiisa goobaha waxbarashada ay u arki karaan dhinacyada kala duwan ee bulshada;
- Waxa uu awoodaa inuu ardada kala hadlo colaadda;
- Waxa u muuqda xiriirka ka dhexeeya helitaanka waxbarasho taya leh iyo yareynta colaadda; iyo
- Waxa uu awoodaa inuu qaabab kala duwan u ururiyo oo uu u taxliiliyo macluumaadka, uuna u fikiro si ballaaran, asagoo su'aallo ka keenaya fikradaha.

## Daraasad xaalad: Difaacidda macallimiinta Thailand[66]

Kacdoon ay koonfurta Thailand ka wadaan qowmiyadda laga tirada badan yahay ee Muslimiinta Malay, ayna uga soo horjeedaan dowladda ay Buudiyiinta hogaamiyaan ayaa meel xun gaaray sanadkii 2004. Ardada, macallimiinta, iyo iskuullada ayaa dhibaato badan kala kulmay colaadda, oo fallaagada ayaa mudadii u dhexeysay 2004 ilaa 2011 waxa ay gubtay oo qarxisay iskuullo badan oo ay dowladda leedahay, halka dhibaateyn iyo dil ay u geysatay macallimiinta.[67] Sanadkii 2010, mas'uuliyiinta waxbarashada ee koonfurta Thailand ayaa sameeyay tiro siyaasado ah oo loogu talagalay in iskuullada looga difaaco weerarrada iyo in laga hortago dilalka loo geysto macallimiinta. Siyaasadaha ayaa waxaa ka mid ahaa:

- ❑ In shan laab la kordhiyo saacadaha casharrada Islaamiga ah la baro iskuullada afarta gobol ee ay ku badan yihiin Muslimiinta Malay, iyo in jadwalka iskuullada la waafajiyo duruusta dheeraadka ah;
- ❑ Baridda luuqadaha Ingiriiska, Malay iyo kuwa maxalliga ah ee qabaa'ilka Muslimka ah;
- ❑ Maalgelinta mashaariic wanaajinaya xiriirka ay dowladda la leedahay bulshada deegaanka, sida beeraha khudaarta ee iskuullada;
- ❑ U wareejinta macallimiinta Buudiyiinta ah magaalooyinka waaweyn ee ammaanka ah, ayagoo laga kabayo kharashaadka dheeriga ah ee safarka iskuullada;
- ❑ Shaqaaleysiinta in ka badan 3,000 oo macallimiin maxalli ah, kuwaasoo bedel u noqda kuwa loo wareejiyay qeybaha kale ee dalka; iyo
- ❑ In carruurta ay guryaha wax ku bartaan marka ay adag tahay tegidda iskuullada, ayadoo macallimiinta bulshada ay guryaha ku booqanayaan.

Ujeedada laga lahaa siyaasadahan ayaa ahayd in xiriir wanaagsan lala yeesha bulshooyinka maxalliga ah, laguna booriyo inay difaacaan macallimiinta, ardada iyo iskuullada, inkastoo aan macluumaad laga hayn in tallaabooyinkaasi ay yareeyeen tirada weerarrada.

## Ansixi siyaasado maalgelin oo colaadda dareensan

Tabashada ku aaddan in dhaqaalaha aan si isla eg loo helin ayaa dhalin karta colaad, waxbarashadana waxa ay bartilmaameed u noqon kartaa weerar.[68] Heerka qaran wax uga qabo arintaasi, ayadoo la tixgelinayo tallaabooyinka soo socda:[69]

➢ Maalgashi ballaaran ku samee deegaannada aan helin adeegyada ku filan;

➢ Hirgeli hannaan maaliyadda lagula socdo oo hufan, isla xisaabtanna leh, tusaale ahaan, ayadoo dabagal lagu samaynayo dhaqaalaha ay bixiso dowladda, tirada adeegyada ay fulisay, iyo xisaab hubin.[70]

➢ Ku wargeli dadka ay khuseyso waxbarashada qorshayaasha maaliyadda iyo hormarka laga gaaray fulinta qorshayaashaasi; iyo/ama

➢ Marka aad wada shaqeyn la yeelanayso deeq-bixiye, tixgeli fikirka ay dadka deegaanka ka qabaan deeq-bixiyahaasi ama dalka deeqda bixinaya.



**Askari Ukrainian ah ayaa fadhiya fasal loo bedelay xero ciidan oo ay leeyihiin askarta lagu celin rabo furinta dagaalka ee Lebedynske, Ukraine.**

*© 2015 Andrew Burton/Getty Images*

## 6. Nidaami difaaca waxbarashada

### Tani maxay ka dhigan tahay?

Nidaaminta difaaca waxbarashada ayaa loola jeedaa in lagu daro heerka maamulka iyo hannaanka hawlgalka Wasaaradda oo ay ka mid yihiin: Qiimeynta waaxda waxbarashada, qorsheynta, barnaamijta, miisaaniyadda, iyo kormeerka maaliyadda. Tani waxa ay u baahan tahay in loo qoondeeyo shaqaale iyo maaliyadba.

### Maxay muhiim u tahay?

In difaaca waxbarashada lagu daro heerka maamulka iyo hannaanka hawlgalka ayaa xaqiijinaya in tallaabooyinka difaaca ee lagu qeexay dukumiintigan si ku filan loo qorsheeyo loona maalgeliyo.

### Samee shaqaalo Wasaaradda u qaabilsan difaaca waxbarashada

➢ Samee mas'uul heer qaran ah oo gudoomiye u noqda guddi ay ka kooban yihiin hay'ado badan oo shaqadiisu tahay ka difaacidda waxbarashada weerarrada iyo in xarumaheeda loo adeegsado ujeedooyin milateri.[71] Waxaa muhiim ah in hawshan bilowgaba laga qeybgaliyo wakiillo ka socda xooggaga difaaca iyo ammaanka.

➢ Ka dhig shaqaalaha Wasaaradda kuwa lagala xiriirayo difaaca waxbarashada ee heer gobol, degmo iyo deegaan.
➢ Ku dar difaaca waxbarashada qeexidda shaqada hogaanka Wasaaradda ee heer qaran iyo heer gobol, iyo dusha kala socoshada hannaanka isla xisaabtanka,
➢ Ansixi qeexidda shaqada iyo qiimeynta waxqabadka shaqaalaha si loo xaqiijiyo in hawlwadeennada waxbarashada lagula xisaabtamo barnaamijta difaaca.

## Ku muuji danaha Wasaaradda ee difaaca waxbarashada qaababka isuduwidda ee jira

Waa in xubnaha guddiga iyo dadka kale ee dejinaya qorshayaasha ay:
➢ Matalaan danaha Wasaaradda ee difaaca waxbarashada ayaga oo ka qeybgalaya shabakadaha gaarka u ah waxbarashada, sida Kooxda Waxbarashada iyo ururada kale ee maxalliga ah.
➢ Matalaan danaha Wasaaradda ee difaaca waxbarashada ee guddiyada aan waxbarashada khuseyn, sida:

- Badqabka iyo ammaanka qaran;
- Nabad dhiska;
- Ka jawaab-celinta xaaladaha degdega ah
- Ka hortagga argagixisada;
- Yareynta khatarta musiibooyinka;
- Maareynta dal dhiska;
- Milateriga;
- Doorashada; iyo
- Maareynta colaadaha.

➢ Martigeliyaan shirar iyo doodo lala yeesho dhinacyada ay khuseyso waxbarashada iyo kuwa aanay khuseyn, si sare loogu qaado wacyiga ku aaddan weerarrada ka dhanka ah waxbarashada, u adeegsiga xarumaheeda ujeedooyin milateri iyo sida wax looga qaban karo.
➢ Aqoonsadaan fursadaha iyo hay'adaha u sharraxan wada shaqeynta si loo hirgeliyo qorshaha qaran ee difaaca waxbarashada.
➢ Ka aqoonsadaan dalalka ansixiyay Bayaanka Badqabka Iskuullada qeybaha la iska kaashan karo si loo meelmariyo Bayaanka iyo weliba Tilmaamaha Ka Hortagga In Ciidamada Ay Iskuullada Iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Ay Dagaalladu[72] (Eeg Lifaaqa 1 iyo 2).
➢ Sameeyaan Heshiis Isfahan oo lagu aqoonsanayo hawsha qofkasta uu qabanayo marka la weerarro waxbarashada ama xarumaheeda loo adeegsado ujeedooyin milateri, ayadoo la kaashaanayo hay'adaha ama Wasaaradaha dowladda ee ay khuseyso (sida, Caafimaadka, Gurmadka Degdega ah, Gaashaandhigga iyo Daryeelka Carruurta).

## Qaabka loo samaynayo?

Fiiro: Waxqabadka la xiriira qiimeynta iyo kormeerka, tallaabooyinka muhiimka ah ee lagu nidaaminayo difaaca waxbarashada waxaa lagu taxay Qeybta 1-aad ee Liiska Waxqabadka.

## Daraasad xaalad: Nidaaminta difaaca iskuullada ee Suudaanta Koonfureed

Wasaaradda Waxbarashada, Sayniska iyo Tiknoolajiyadda oo kaashanaysa tan Dhaqanka, Dhalinyarada iyo Cayaaraha ayna taageerayaan dowladda Netherlands iyo hay'adda UNICEF ayaa martigelisay shir qaran oo cinwaan looga dhigay goobaha waxbarashada waa deegaanno nabadeed, waxaana kasoo qeybgalay 150 ergo oo ka kala socota guud ahaan Suudaanta Koonfureed, ayna ka mid yihiin dhalinyaro. Waxaa lagu heshiiyay heerarka ugu hooseeya ee goobaha waxbarashada ayadoo la saxiixay war-murtiyeedka in goobaha waxbarashada ay yihiin kuwo nabadeed. Wasaaradda waxbarashada oo war-murtiyeedka saxiixday ayaa ballanqaaday inay wax ka qabanayso sababaha dhaliyay colaadda, difaacayso ardada, ayna hormarinayso in colaadda lagu xalliyo qaab nabad ah. Waxaa la filayaa in mashruuc waxbarasho oo nabada hormarinaya laga billaabo dhammaan 10-ka gobol ee dalkaasi (inkastoo aan waqti cayiman loo qaban hirgelinta mashruucaasi). Maadooyin ku saabsan xirfadaha noolasha iyo nabad dhiska ayaa lagu tijaabiyay 48 xarumood, waxaana lagu dari doonaan manhajka qaran.[73]

## Tilmaan

Si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho qaabka wax looga qabto badqabka, adkeysiga, iyo isku duubnida bulshada ee mid kasta oo ka mid ah 5-ta marxaladood ee hannaanka qorsheynta waaxda waxbarashada, eeg buugga 6-da qeybood ka kooban: badqabka, adkeysiga, iyo isku duubnida bulshada: Hagaha Dadka Qorsheeya Waaxda Waxbarashada (PEIC iyo UNESCO-IIEP iyo IBE, 2015). Waxaa sidoo kale la daabacay buugaag barbar socota oo ku aaddan in arimahaasi lagu daro hormarinta manhajka iyo tababarka macallimiinta.[74]

## Samee qorshayaasha Wasaaradda ee difaaca waxbarashada

Waa in xubnaha guddiga iyo dadka kale ee dejinaya qorshayaasha ay:

- ➢ Qoraan hagaha samaynta qorshaha ka hortagga, yareynta iyo ka jawaab-celinta weerarrada ka dhanka ah waxbarashada iyo in xarumaheeda loo adeegsado ujeedooyin milateri[75]. Adeegsadaan tallaabooyinka lagu xusay Liiskan Waxqabadka si uu u hago;
- ➢ Taageero dhaqaale iyo mid farsamo u fidiyaan xafiisyada gobollada si ay u diyaarsadaan qorshayaashooda maxalliga ah ee ay ku difaacayaan waxbarashada;
- ➢ Shardi uga dhigaan xafiisyada qaran iyo kuwa gobolka inay soo saaraan qorshe ku aaddan difaaca waxbarashada;
- ➢ Muddo ka dib ay dib-u-eegis, dib-u-habayn iyo joogteyn ku sameeyaan qorshayaasha difaaca waxbarashada;
- ➢ Dhaqaalo u qoondeeyaan hawlaha iyo qorshayaasha difaaca waxbarashada;
- ➢ Dib-u-eegis sanadla ah ku sameeyaan hormarka laga gaaray yoolalka ku xusan qorshayaasha Wasaaradda; iyo/ama
- ➢ Ku daraan arimaha la xiriira weerarrada ka dhanka ah waxbarashada iyo u adeegsiga xarumaheeda ujeedooyinka milateri qorshayaasha khuseeya sida: badqabka iskuullada, yareynta khatarta musiibooyinka, nabad dhiska iyo ka hortagga argagixisada.

## Daraasad xaalad: Siyaasadda Qaran ee Nepal ee ah in Iskuulladu yihiin goob nabadeed[76]

Bishii Mey 2011, Wasaaradda Waxbarashada ee dalka Nepal ayaa soo saartay Nidaamka Qaran ee in Iskuulladu yihiin goobo nabadeed iyo Tilmaanta Hirgelinta 2068. Tilmaanta ayaa noqotay tallaabada koobaad ee muhiimka u ahayd in difaacidda waxbarashada lagu daro sharciga qaranka. Waxaa hoos ku qoran qeyb ka mid ah sharcigaasi:

“Yoolka: Dhammaan iskuullada Nepal waxay noqonayaan goobo nabadeed.

Ujeedooyin:

1. In iskuullada laga ilaaliyo falalka hubaysan iyo kuwa kale ee rabshadaha wata.
2. In iskuullada laga ilaaliyo siyaasadaha ku dhisan xisbiga iyo faragelinta kale.
3. In iskuullada laga ilaaliyo faquuqa, tacaddiga, dayaca iyo ka faa’iideysiga.”

Dukumiintiga ayaa lagu caddeeyay hawlaha iyo shuruudaha dhammaan saddexda ujeedo. Tusaale ahaan, hoos waxaa ku qoran qeyb ka mid ah liiska shuruudaha ee Ujeedada 1.

“In iskuullada laga ilaaliyo falalka hubaysan iyo kuwa kale ee rabshadaha wata ayaa waxaa ku xiran shuruudaha soo socda:

a Lagama samayn karo wax fal hubaysan ah gudaha dhismaha iskuulka iyo agagaarkiisa

b Kuma sugnaan karaan dhismaha iskuulka xooggag hubaysan, ama dhinac ka mid ah kuwa dagaallamaya.

c c Looma adeegsan karo iskuulka falal hubaysan.

d Lama oggola in la afduubto ardada, macallimiinta, shaqaalaha iyo xubnaha guddiga maamulka iskuulka, ama in lagu daro hawlaha xooggaga hubaysan, ama in la qasbo, si sharci darra ah loo xiro, ayna hanjabaad uga timaado dhinacyada kala duwan ee colaadda ku lugta leh.

e In aanay dhinacyada hubaysan adeegsan ardada, macallimiinta, shaqaalaha iyo maamulka waxbarashada.

f In dhinacyada hubaysan aanay tababar, hawlo ciidan iyo basaasnimo ku samayn gudaha iskuulka iyo agagaarkiisa.

g In aan hub iyo walxaha qarxa lasoo gelin gudaha iskuulka ama meelaha u dhaw, marka laga reebo in loo adeegsanayo hawlaha waxbarashada.

h In wax kasta oo dhaca aan iskuullada la weerarri karin, beegsan karin, gabbaad laga dhigan karin ama aan burbur la gaarsiin karin.

i In wax kasta oo dhaca aan rabshad ama wax dhalin kara la gaarsiin karin iskuulka iyo agagaarkiisa.

j In la ilaaliyo ixtiraamka ka dhexeeya ardada iyo macallimiinta kala ra’yiga iyo caqiidada ah.”

## Dhis awoodda shaqaalaha Wasaaradda

➢ Ku tababar dhammaan shaqaalaha Wasaaradda ee heerarka kala duwan mowduucyadan difaaca waxbarashada:

- Dusha kala socoshada iyo ka warramidda tacaddiyada ka dhanka ah xuquuqda carruurta iyo tan aadanaha;
- Diyaarinta qorshayaal xakamayn ah oo ku salaysan iskuullada, kuna aaddan weerarridda waxbarashada iyo u adeegsiga xarumaheeda ujeedooyin milateri;
- Tilmaamaha ka hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada ay Dagaalladu Socdaan iyo Bayaanka Badqabka Iskuullada;
- Heerarka Ugu Hooseeya ee Waxbarashada Xaaladaha Degdega ah ee INEE;77
- Qaababka taageerada maskaxeed;
- Qaabab bedel ah oo wax lagu baranayo marka iskuulladu xirmaan;
- U ololeynta iyo xoojinta xuquuqda waxbarashada;
- Ka hortagga tacaddiyada muuqda iyo kuwa galmada, qoroshada carruurta ee dhinacyada hubaysan;
- Qaabka iyo qofka loo gudbinayo kiisaska xadgudubka ah iyo hannaanka jawaab-celinta waqtiyeysan;
- Nidaamka digniinta hore (rasmi iyo aan rasmi ahayn, sida macallimiinta oo farriin telefoon u qora waalidka);
- Gargaarka degdega ah;
- Daadgureynta iskuulka;
- Badqabka iskuulka (Eeg daraasadda xaaladda hoose; iyo
- Wehlinta ardada iyo macallimiinta marka ay u socdaan iyo marka ay ka imanayaan iskuulka, iwm.

### Daraasad xaalad: Nidaaminta difaaca iskuullada ee Pakistan[78]

Hindisaha Badqabka Iskuullada ayaa waxaa la billaabay bishii Maarso 2015, asagoo ay taageerayaan dowladda Pakistan iyo Wakiilka Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u qaabilsan waxbarashada, Gordon Brown. Ujeedka hindisaha ayaa ah in taageero dhaqaale iyo mid farsamo la siiyo waxqabadka dowladda heer qaran iyo heer gobol ee lagu difaacayo waxbarashada. Hindisaha ayaa lagu soo bandhigay qorshe 15 qodob ah kaasoo diiradda lagu saarayo qaababka ugu wanaagsan ee waxbarashada Pakistan looga difaaci karo weerarrada, waxaana ka mid ah faragelin heer bulsho ah, in qorshayaasha laga qeybgeliyo waalidiinta iyo hogaamiyayaasha diimaha; faragelin heer iskuul ah; iyo tallaabooyin dheeraad ah oo ku aaddan deegaannada khatarta badan. Marka laga tago in la xoojiyo dhismaha iskuullada, ayaa hindisahan waxa uu soo bandhigayaa tilmaamo la adeegsan karo si khatarta weerarrada looga bixiyo jawaab ku salaysan xaalka taagan. Tusaale ahaan, waxa uu ku baaqayaa:

➢ In shaqaalaha loo tababar inay noqdaan saraakiisha badqabka iskuulka;

➢ Qorshayaasha xakameynta waxbarashada oo uu ka mid yahay hannaanka jawaab-celinta degdega ah;

➢ Borotokoolka badqabka safarka;

➢ Isgaarsiin wanaagsan; iyo

➢ In si gaar ah loo maalgeliyo sugidda ammaanka iskuullada, si aan wax loogu dhimin tayada xarumaha waxbarashada.

### Go'aami qiimaha iyo maalgelinta barnaamijta iyo siyaasadaha lagu difaacayo waxbarashada

➢ Aqoonso oo qiyaas qiimaha tallaabooyinka ay xulatay Wasaaradda, sida kuwa lagu xusay Liiskan Waxqabadka.
➢ Qiyaas qiimaha barnaamijta difaaca ee xaaladaha kala duwan ee colaadda; tusaale ahaan, hadduu dagaal ka qarxo gobol oo la weerarro macallimiin badan, ama haddii doorasho ay dhacayso sanadkaasi taasoo sare u qaadaysa khatarta ah in iskuullada loo adeegsado goobo codbixin.
➢ Mudnaan kala sii oo kala hormari barnaamijta ayadoo lagu salaynayo helitaanka, suuragalnimada iyo dowrka ay ka qaadanayaan hirgelinta ujeedooyinka gobol ee lagu difaacayo waxbarashada.
➢ Ku bilow tallaabooyinka suuragalka ah maanta, isla markaana samee qorshayaal hormar leh oo mustaqbalka fog ah.
➢ U qoondee qeyb ka mid ah miisaaniyadda waaxda tacliinta barnaamijta waxbarashada looga difaacayo weerarrada iyo in xarumaheeda loo adeegsado ujeedooyin milateri.
➢ Marka la aqoonsado meelaha ay haysato dhaqaalo la'aanta, kala shaqee hay'adaha maxalliga ah ee tacliinta sidii dhaqaale loogu ururun lahaa barnaamijta waxbarashada looga difaacayo weerarrada iyo in xarumaheeda loo adeegsado ujeedooyin milateri.

## 7. U ololee taageeradda

### Tani maxay ka dhigan tahay?

Qeybihii hore ee dukumiintigan waxaa xoogga lagu saaray tallaabooyinka ay qaadi karaan wasaaradaha mas'uulka ka ah waxbarashada. Qeybtan ugu dambeysa waxaan diiradda ku saaraynaa tallaabooyinka ay Wasaaradaha ka codsan karaan dhinacyada kale (sharci, milateri iyo siyaasad) si ay gacan uga geystaan ka difaacidda waxbarashada weerarrada iyo in iskuullada loo adeegsado ujeedooyin milateri. Ololeynta ayaa loola jeedaa hannaanka saamaynta loogu yeelanayo dadka go'aanka leh, saamileyda iyo kooxaha kale ee muhiimka ah si ay u taageeraan fulinta tallaabooyin gaar ah.[79]
Ololeynta ayaa waxaa ka mid ah:
➢ Ogaanshaha dadka aad la hadlayso iyo danahooda;
➢ Aqoonsashada waxa gaarka ah ee aad codsaneyso;
➢ Diyaarinta dhowr farriimood oo ku saabsan muhiimadda ay leedahay waxa aad codsaneyso; iyo
➢ Qeexidda qaabka ay dadka ku dhagaysanaya uga faa'iideysanayaan haddii la helo waxa aad codsaneyso.

### Maxay muhiim u tahay?

Difaaca waxbarashada ayaa waxaa qeyb ka ah dhinacyo badan oo ay ka mid yihiin sharciga, milateriga iyo siyaasadda. Waa in shaqaalaha wasaaradda ay yaqaanaan qaabka loo ololeeyo iyo waxa ay weydiisan karaan dhinacyadaasi si loo abuuri jawi lagu difaaci karo waxbarashada. Waxaa kala duwan istaraatijiyadaha ololeynta ee wasaaradaha, ayagoo ku salaysan dhaqaalaha loo hayo hawlahooda. Waxaa hoos ku qoran liis sharraxan oo ku aadan waxa la weydiisan karo saddexda waax ee sharciga, milateriga iyo siyaasadda.

## Qaabka loo samaynayo?

### Uga dhex ololee hay'adaha dowladda iyo xildhibaannada si waxbarashada loogu heli difaac sharci

Nidaamka sharciga ayaa gundhigga u ah qaabka xuquuqda ku salaysan ee lagu wajahayo waxbarashada. Waxa uu hannaanka isla xisaabtanka u sameeyaa siyaasadaha iyo barnaamijta lagu difaacayo waxbarashada. Sharciga difaaca waxbarashada ayaa sidoo kale waxa uu qeyb ka yahay shuruuc caalami iyo maxalli ah sida sharciga carruurta, kan xuquuqda aadanaha, ka dembiyada, iyo kan shaqaaleysiinta (Eeg Lifaaqa 3 ee qeexaya qaar ka mid ah shuruucda caalamiga ah ee khuseeya).

➢ Ka dhex ololee xildhibaannada iyo hay'adaha dowladda ee ay khuseyso waxbarashada si dib-u-eegis loogu sameeyo— ama isbedel loogu sameeyo— nidaamka sharciga ee qaranka (sharciga, nidaamka, amarka ama qawaaniinta) si ay:[80]

- Dembi uga dhigaan noocyada kala duwan ee xadgudubyada ka dhanka ah sharciga caalamiga ee u dhigma weerarridda waxbarashada;
- Ugu daraan sharciga qaranka in iskuullada iyo goobaha waxbarashada ay yihiin meelo nabadeed oo ka caaggan colaadda;
- U xaqiijiyaan maqaamka ilaalinta ee ay leeyihiin ardada, macallimiinta, shaqaalaha waxbarashada iyo iskuullada;
- U qeexaan shuruucda iyo nidaamyada khuseeya joogitaanka difaaca (ilaalo hubaysan) ee iskuullada iyo xarumaha waxbarashada; iyo
- U saxiixaan, haddii aan horay loo samayn, Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada iyo Dhaqanka, ee uu ku jiro xaqa waxbarashada, iyo borotokoolka khiyaariga ah ee Axdiga Xuquuqda Carruurta.[81]

➢ Iyo:

- Tixgelinta samaynta qodobo sharci oo si cad xarumaha waxbarashada uga difaacaya u adeegsiga ujeedooyinka milateri, kuwaasoo waafaqsan waxyaabaha ku qoran Tilmaamaha ka hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada ay Dagaalladu Socdaan, gaar ahaan haddii dalka uu ansixiyay Bayaanka Badqabka Iskuullada.

### Qaraarrada Golaha Ammaanka ee Iskuullada Ka Difaaca in Loo Adeegsado Ujeedooyin Milateri

Qaraarka Golaha Ammaanka 2143 oo la meelmariyay Maarso 2014, ayaa ku dhiiragelinaya dhammaan dalalka inay "tallaabooyin cad ka qaadaan sidii looga hortagi lahaa in ciidamada dowladda iyo kuwa aan dowliga ahayn ay iskuullada u adeegsadaan si ka baxsan sharciga caalamiga ah." Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ayaa sheegay: "Waxaan ku faraxsanahay in qaraarka maanta idin horyaalla uu dhiiragelinayo samaynta tilmaamo khiyaari ah oo looga hortagayo in iskuullada ku yaal goobaha colaadda loo adeegsado ujeedooyin milateri. Waxaan ugu baaqayaa dalalka iyo dhammaan dhinacyada ku lugta leh colaadda inay si weyn u difaacaan xarumahan muhiimka ah." Golaha Ammaanka ayaa baaqiisa ku celiyay markale qaraarka 2225 (2015) asagoo ugu baaqay dalalka inay si dhab ah "tallaabooyin cad uga qaadaan adeegsiga iskuullada ee ay ku kacaan ciidamada dowladda iyo xooggaga hubaysan."[82]

### Tilmaan

Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku aaddan difaaca sharciga caalamiga ah ee xuquuqda waxbarashada oo ah mid bani'aadannimo, iyo waxbarashada guud ahaan xaaladaha amni darrada iyo colaadaha, eeg Difaaca Waxbarashada ee Xaaladaha Amni Darrada iyo Colaadda: Buugga gacanta ee Sharciga Caalamiga ah (PEIC iyo BIICL, aan taariikh lahayn).

➢ U ololee in xirfadlayaasha sharciga ee ka shaqeynaya qeybaha la xiriira ay fahmaan Difaaca Waxbarashada ee Xaaladaha Amni Darrada iyo Colaadda: Buugga gacanta ee Sharciga Caalamiga ah (iyo cusboonaysiintiisa) iyo Tilmaamaha ka hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada ay Dagaalladu Socdaan.

➢ Ka dhex ololee hay'adaha cadaallada si loola xisaabtamo kuwa geysta weerarrada, ayadoo tusaale ahaan:[83]

- In baaritaan madax bannaan oo nidaamsan lagu samaynayo tacaddiyada kala duwan ee ka dhigan weerarridda waxbarashada, dilalka macallimiinta iyo shaqaalaha waxbarashada;
- In la daabaco warbixinnada;
- In la dabagalo, lana maxkamadeeyo kuwa geysta weerarrada ka dhanka ah waxbarashada si waafaqsan sharciga caalamiga ah iyo heerarkiisa; iyo
- In weerarrada ka dhanka ah waxbarashada lagu daro hannaanka cadaaladda kala guurka, sida guddiyada runta iyo dib-u-heshiisiinta, kuwa xaqiiqa raadinta iyo dhammaan hannaanka cadaallada.

## U ololee in milateriga dowladda uu xaqiijiyo difaaca waxbarashada

Falalka ciidamada hubaysan ayaa si toos ama si dadban caqabad ugu noqon kara xuquuqda helitaanka waxbarashada. Gaar ahaan marka ay ciidamada adeegsadaan iskuullada, waxa ay taasi horseedi kartaa in dhismaha weerar lala beegsado, halka ay khatar galinayso ammaanka ardada iyo macallimiinta, ayna waalidiinta ku dhalin karto inay carruurtooda kala baqaan iskuulka. Wasaaradaha waxa ay u ololeyn karaan in saraakiisha milateriga ay qaadaan tallaabooyinka hoos ku xusan si ay u difaacaan waxbarashada.

➢ U ololee in ciidamada dowladda iyo haddii ay suuragal tahay kuwa aad dowliga ahayn ay:[84]

- Buugaagtooda milateri, shuruucda iska horimaadka, awaamirta hawlgalka iyo qaababka kale ee dhaqanka milateriga ku daraan Tilmaamaha ka hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada ay Dagaalladu Socdaan;
- Bixiyaan awaamir cad oo soo maray taliska kuwaasoo lagu mamnuucayo weerarrida waxbarashada, xakameynaya u adeegsiga iskuullada ujeedooyin milateri;
- Qaadaan tallaabooyin degdeg ah oo qaabka ugu haboon loogu edbinayo ciidamada sida sharciga ka baxsan u weerarra ama u adeegsada iskuullada;
- Ku tababaraan ciidamada ammaanka, booliska iyo milateriga sharciga caalamiga ah ee bani'aadannimada iyo kan xuquuqda aadanaha, si loo yareeyo taccadiyada;
- Si shaac baxsan u caddeeyaan mamnuucidda weerarrada ka dhanka ah waxbarashada iyo xakameynta in xarumaheeda loo adeegsado ujeedooyin milateri;
- Marnaba si ula kac ah u weerarrin shacabka, sida ardada, macallimiinya iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada; iyo
- Marnaba si ula kac ah u weerarin dhismayaasha u gaarka ah waxbarashada ee aan laga dhigin xarumo ciidan. Tilmaanta 4 ee Tilmaamaha ayaa ku dhiiragelinaysa dhinacyada dagaallamaya inay qaadaan tallaabooyin bedel u noqon kara weerarrida iskuullada iyo jaamacadaha loo adeegsado ujeedooyinka milateri.[85]

## Daraasad xaalad: Wasaaradda Waxbarashada ee Colombia oo kala shaqeyneysa Wasaaradaha kale Difaaca Waxbarashada[86]

Tan iyo 2008, Wasaaradda Waxbarashada ee Colombia ayaa xoogga saartay sidii ay isbahaysi muhiim ah ula yeelan lahayd hay'adaha gargaarka caalamiga ah, kuwa aan dowliga ahayn ee maxalliga iyo caalamiga ah, iyo hay'adaha kale ee dowladda si loo xoojiyo awoodda dhinacyada kala duwan, xoghaynta waxbarashada iyo in iskuullada iyo bulshooyinka ay isu diyaariyaan, uga jawaab-celiyaan ayna uga soo kabsadaan xaaladaha degdega ah ee ay ka midka yihiin xasaradaha colaadda hubaysan. Wasaaradda ayaa qaaday dhowr tallaabo oo ku aaddan wada shaqeynta, gaar ahaan arinta difaaca waxbarashada, tusaale ahaan:

- Wasaaradda Waxbarashada ayaa samaysay hannaan ay wada shaqeyn kula yeelanayso Wasaaradda Gaashaandhigga, Waaxda Maaraynta Musiibooyinka Qaran, iyo Wasaaradda Arimaha Gudaha si iskuullada looga difaaco colaadda;
- Wasaaradda ayaa kala qeyb qaadatay dhiggeeda Gaashaandhigga dhowr xiriir oo gudaha iyo laba geesood ah kuna aaddan yareynta ama gebi ahaanba joojinta in iskuullada loo adeegsado ujeedooyin milateri;
- Wasaaradda ayaa qeyb ka ah hoggaanka guddi dhinacyo badan ka kooban oo ka hortaga qorashada iyo adeegsiga carruurta ee ururada hubaysan ee sharci darrada ah, waxaana ay la shaqeysaa waaxda Tallaabada Muhiimka ah; iyo
- Guddiga Qaran ee Waxbarashada oo kaashanaya Wasaaradda ayaa diyaariyay siyaasad dhinacyo badan khuseysa oo ku aaddan talooyinka degdega ah ee waxbarashada looga difaaci karo saamaynta colaadda.

## Caqabadaha ku aaddan u ololeynta xakameynta in dhinacyada hubaysan ay ujeedooyin milateri u adeegsadaan iskuullada

➢ Waxaa inta badan kooban wacyiga ku saabsan cawaaqibka xun ee ka dhalan kara in iskuullada loo adeegsado ujeedooyin milateri, waxaana taliyayaasha ay u arkaan inay ka weyn tahay faa'iidada ay ka heli karaan adeegsigaasi. Waa in ciidamada iyo xooggaga hubaysan la dareensiiyaa arintan ka hor inta aan laga hadlin tallaabooyinka ka hortagga iyo wax ka qabashada. Shaqaalaha wasaaradda ayaa marka ay haboon tahay, oo uu ammaanka saamaxayo dowr ka qaadan kara wacyigelintan.
(Eeg qaanadda bogga 25), ama iskaashiga hay'adaha ku takhasusay. Ama talooyin ka eeg dukumiintiga GCPEA, Casharrada Colaadda 2015[87]

## Uga dhex ololee hay'adaha dowladda si waxbarashada loogu heli difaac siyaasadeed

Hay'adaha dowladda ee aan ku shaqada lahayn waxbarashada ayaa si weyn gacan uga geysyan kara in la helo jawi lagu difaaco waxbarashada. Shaqaalaha wasaaradda ayaa saamayn ku yeelan kara hay'adaha dowliga ah ee aan waxbarashada ku hawlaneyn, sida xafiisyada Madaxweynaha iyo Ra'iisal wasaaraha, Wasaaradda Arimaha Dibedda iyo guddiyada gaarka an (sida kan doorashada) si ay u taageeraan difaaca waxbarashada, ayaga oo qaadaya tallaabooyinka hoos ku xusan:

➢ U ololee in hay'adaha dowladda ee muhiimka ah ay:

- ✓ Taageero ballaaran u muujiyaan difaaca waxbarashada iyo yareynta in iskuullada loo adeegsado ujeedooyin milateri;
- ✓ Ka qaran ahaan wadajir u go'aansadaan, haddaan sidaa horay loo samayn, ansixinta Bayaanka Badqabka Iskuullada, sidaana ku samaynaya ballanqaadyo adag oo lagu difaacayo, laguna xaqiijinayo inay waxbarashada sii socoto xilliyada colaadda, sidoo kalena ansixinaya, isla markaana adeegsanaya Tilmaamaha ka hortagga in Ciidamada ay Iskuullada iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada ay Dagaalladu Socdaan.

- Tilmaamaha ku daraan siyaasadda qaran iyo nidaamyada hawlgalka ee khuseeya;
- Kordhiyaan dhaqaalaha la siiyo siyaasadaha iyo barnaamijta waxbarashada ka difaaca weerarrada iyo in iskuullada loo adeegsado ujeedooyin milateri;
- Wax ka bedelaan siyaasadaha khuseeya ee aan waxbarashada ahayn—sida kuwa goobaha codbixinta, ololaha siyaasadeed, yareynta khatarta musiibooyinka, iyo isu diyaarinta xaaladaha degdega ah— si loo hormariyo waxbarasho la difaacay oo ka caaggan colaadda; iyo
- Xaqiijiyaan, haddii ay suuragal tahay, in heshiis kasta oo colaadda ka dib ah lagu daro arimaha khuseeya weerarrada ka dhanka ah waxbarashada, iyo weliba sharciga caalamiga ah ee difaacaya waxbarashada.

➢ U ololee in dowladda ay xaqiijiso in dhismayaasha waxbarashada, shaqaalaha iyo ardada aan loo adeegsan arimaha siyaasadda ama doorashada, haddii ay taasi khatar gelinayso iskuulka, shaqaalaha waxbarashada ama ardada.[88] Ka codso hay'adaha dowladda, sida guddiga doorashada inay:

- Qiimeeyaan (ama ay la shaqeeyaan hay'ad qiimeyn karta) khatarta waxbarashada ku iman karta inta ay socdaan doorashooyinka;
- Kala shaqeeyaan dhinacyada waxbarashada inay la wadaagaan macluumaadka ku aaddan weerarrada ka dhanka ah waxbarashada ee xilliyada doorashada, si loo ogaado qaabka iyo xajmiga dhibaatada;
- Goobaha codbixinta ka dhigaan meelo aan iskuullada ahayn;
- Xakameeyaan ama meesha ka saaraan dowrka iyo waajibaadka macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee waxbarashada ay ku leeyihiin hannaanka doorashada; iyo
- Isuduwaan sidii kormeerayaasha doorashada, booliska, shaqaalaha gurmadka degdega ah iyo dhinacyada kale ee muhiimka u ah jawaab-celinta ay u difaaci lahaayeen macallimiinta iyo iskuullada haddii ay dhacaan rabshado la xiriira doorashada.

## Daraasad xaalad: Difaaca Macallimiinta inta ay Doorashooyinka Ka Socdaan Gobolka Muslimiinta Filibiin ee Mindanao[89]

Si la mid ah dalal badan oo caalamka ah, dalka Filibiin waxa uu xiriir dhaw ka dhexeeyaa codbixinta iyo iskullada. Shaqaalaha dowladda ee waxbarashada ayaa xubin ka ah Guddiga Hawlwadeennada Doorashada, iskuulladana waxaa loo asteeyaa doorashada. Balse deegaanno gaar ah oo ay colaad ka taagan tahay, ayaa ururo siyaasadeed iyo kuwo hubaysan waxa ay weerarreen macallimiinta ka hor, inta lagu guda jiro iyo weliba ka dib maalinka codbixinta.

Horraantii 2013, waaxda waxbarashada ee ismaamulka gobolka Mindanao ee ay degaan Muslimiinta Filibiin waxa ay meelmarisay Heshiiska Amarka 26, kaasoo lagu sameeyay Waaxda Ka Jawaab-celinta Saamaynta Doorashada ee Waxbarashada. Si ay u difaacdo macallimiinta, ayaa waaxdu waxa ay samaysan saddex qodob:

➢ Borotokool lagu soo gudbiyo weerarrada ka dhanka ah macallimiinta;
➢ Kaalmo sharci oo lagu caawinayo macallimiinta la weerarray; iyo
➢ Fasax ah in macallimiinta ay si kumeelgaar ah ugu bedelan karaan iskuul kale, haddii ay dareemaan inay khatar kasoo wajahayso doorashada ka dhacaysa iskuulladooda.

## Walaaca ammaan iyo anshax ee ku aaddan xakameynta in iskuullada loo adeegsado ujeedooyin siyaasadeed

Waxaa jira dhowr caqabadood oo ka dhalan kara xakameynta in iskuullada loo adeegsado ujeedooyin siyaasadeed:

- Waxaa adkaan karta in la qeexo waxa loola jeedo adeegsi siyaasadeed iyo arimaha soo hoos galaya. Waa in hannaankan lagu saleeyo heer maxalli ah oo ku dhisan wadaxaajood iyo ka qeybgal loo dhan yahay, si looga baaqsado in la huriyo xiisadda deegaanka; iyo
- Ma aha in dhammaan falalka u adeegsiga iskuullada ujeedooyinka siyaasadeed ay khatar keenayaan, Sidaa awgeed, waa in laga xaajoodo oo si sax ah loo qeexo siyaasadaha looga gol leeyahay in iskuullada laga dhigo kuwo "ka caaggan siyaasadda" si loo ogaado waxyaabaha mamnuuca ah iyo xaaladaha ay ku iman karaan, si la mid ah Hab-dhaqanka Iskuullada looga dhigay goobo nabadeed. Ugu dambeyn, waa in siyaasadaha diiradda lagu saaraa sidii loo yareyn lahaa saamaynta xun ee ay falalka xisbiyada siyaasadda ku yeelan karaan xuquuqda carruurta, gaar ahaan xaqa waxbarashada.





**Dagaalyahanno Xuutiyiin ah ayaa eegaya dhismo iskuul oo ku burburay duqeyn ay diyaaradaha xulafada Sacuudiga ka geysteen Ibb's Yarim, Yemen 23-kii Abriil 2015.**

*© 2015 Adeil Al-Sharee/Anadolu Agency/Getty Images*

# LIFAAQ 1: TILMAAMAHA KA HORTAGGA IN CIIDAMADA AY ISKUULLADA IYO JAAMACADAHA ADEEGSADAAN XILLIYADA AY DAGAALLADU SOCDAAN[90]

***Tilmaamaha Ka Hortagga In Ciidamada Ay Iskuullada Iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Ay Dagaalladu Socdaan ayaa waxaa lagu diyaariyay sanado badan oo wadaxaajood lala lahaa dalalka, hay'adaha Qaramada Midoobay, iyo hay'adaha aan dowliga ahayn, waxaana ujeedku ahaa in si wanaagsan looga hortago weerarrada iyo u adeegsiga ujeedooyinka milater ee dhinacyada hubaysan ay kula kacaan iskuullada iyo jaamacadaha. Waxa ay hagitaan wanaagsan siiyaan ciidamada dowladda iyo kuwa aan dowliga ahayn ee qorsheynaya ama fulinaya hawlgallada milateri. Waxa ay sidoo kale waxtar u leeyihiin hay'adaha ku hawlan, kormeerka, mashaariicda iyo u ololeynta hab-dhaqanka wanaagsan ee colaadaha hubaysan.***

**Tilmaan 1:** Looma oggola ciidamada dhinacyada dagaallamaya inay adeegsadaan iskuullada iyo jaamacadaha shaqeynaya ama ay ku taageeraan hawlgalkooda milateri.

(a) Qodobkan waxaa hoos imanaya iskuullada iyo jaamacadaha sida kumeelgaarka ah u xiran, kuwa saacadaha iyo maalmaha fasaxa ah ku jira, iyo kuwa galay fasaxa sanad dugsiyeedka,

(b) Dhinacyada isku haya colaadda ma adeegsan karaan awood ama sasabasho kale si ay maamulka waxbarashada ugu qanciyaan in xarumaha la xiro si loogu adeegsado dano milateri.

**Tilmaan 2:** Looma oggola in dhinacyada ku lugta leh colaadda ay ujeedooyin milateri u adeegsadaan iskuullada iyo jaamacadaha u xirmay khatar uga timid dagaalka awgeed, marka laga reebo in xaaladda jirta ay sidaa ku kalifto, isla markaana aanay jirin wax bedel u noqon kara oo ay adeegsan karaan ciidankaasi. Waxaa xarumahaasi waxbarashada ee laga guuray la adeegsan karaa ilaa iyo inta laga helayo meel kale oo uga haboon adeegsiga milateri. Waa in mudnaanta la siiyaa dhismayaasha kale oo la adeegsadaa bedelkii ay ciidanka degi lahaayeen iskuullada iyo jaamacadaha, xataa haddii aanu qaabkooda wanaagsaneyn, waxaase reeban in la adeegsado dhismayaasha uu ilaaliyay Sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadannimada (sida cisbitaallada), waana in maanka lagu hayo in dhinacyada ku lugta leh colaadda ay weerarrada ka ilaaliyaan hantida shacabka.

(a) Waa in waqtiga ugu kooban uu qaataa u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee iskuullada iyo jaamacadaha laga guuray.

(b) Waa in xooggaga hubaysan ee qeybta ka ah colaadda, isla markaana adeegsanaya iskuullada iyo jaamacadaha laga guuray ay u oggalaadaan mas'uuliyiinta waxbarashada inay dib u furan xarumahaasi ka dib marka ay ka baxaan ciidanka, waa haddii aanay arintaasi khatar galineyn ammaanka ardada iyo shaqaalaha.

(c) Marka ay ciidanka ka guurayaan xarunta waxbarasho, waxaa looga baahan yahay inay dayactir buuxa ku sameeyaan burburka soo gaaray dhismayaasha, ayna xaqiijiyaan inay meesha ka saaraan dhammaan waxyaabaha muujinaya in goobta uu ciidan adeegsanayay. Gaar ahaan waa in goobta laga nadiifiyaa dhammaan hubka, rasaasta iyo walxaha aan weli qarxin.

**Tilmaan 3:** Lama oggola in iskuullada iyo jaamacadaha loo burburiyo si aanay mustaqbalka u isticmaalin xooggaga dhinaca kale ee qeybta ka ah colaadda hubaysan. Xilli kasta, iskuullada iyo jaamacadaha waa hanti shacab, haddii ay ahaan lahaayeen kuwa ay waxbarashada ka socoto ama ku jira fasax gaaban ama mid dheer, ama laga guuray.

**Tilmaan 4:** Inkastoo haddii dhinac ka mid ah xooggaga dagaallamaya uu iskuullada ama jaamacadaha u adeegsado ujeedooyin milateri ay ka dhigi karto, ayadoo la eegayo xaaladda, xarumo ciidan oo weerar lala beegsan karo, ayaa haddana dhinaca kale ee hubaysan waxaa looga baahan yahay inuu ka baaraandego qaabab kale ka hor inta aanu weerarrin xarumahaasi, sida in haddii xaaladu saamaxayso uu waqti hore usii digaa cadowgiisa inuu weerar kusoo wajahan yahay haddii aanu ka guurin xaruntaasi.

(a) Ka hor inta aanu dhinac ka mid ah xooggaga dagaallamaya weerarrin iskuulka, waxaa looga baahan yahay inuu tixgeliyo xaqiiqda ah in carruurta ay leeyihiin ixtiraam iyo ilaalin. Sidoo kale waa inuu tixgeliyaa saameynta xun ee mudada dheer ay bulshada ku yeelan karto helitaan la'aanta waxbarasho ee ka dhalata burburinta iskuullada.

(b) Ma aha in dhinac ka mid ah xooggaga dagaallamaya uu kusoo duulo iskuulka uuna ka qabsado dhinaca kale si uu danihiisa milateri ugu soo wato. Waa in sida ugu dhaqsaha badan meesha looga saaraa waxyaabaha muujinaya in goobta uu ciidan adeegsanayay, isla markaana lagu wareejiyaa mas'uuliyiinta rayidka ah si xarunta loogu adeegsado hawlaha waxbarashada.

**Tilmaan 5:** Ma aha in askar ka tirsan dhinacyada ku lugta leh colaadda loo qorto inay sugaan ammaanka iskuullada iyo jaamacadaha, waa haddii ay jiraan dad kale oo hawshaas qaban kara. Haddii ay suuragal tahay, shacab si wanaagsan loo tababaray ayaa loo shaqaaleyn karaa sugidda ammaanka iskuullada iyo jaamacadaha. Haddii lagama maarmaan ay tahay, waxaa la tixgelin karaa in carruurta, ardada iyo shaqaalaha loo daadgureeyo meel ammaan ah.

(a) Haddii askar ka tirsan dhinacyada dagaallamaya ay ku hawlan yihiin sugidda ammaanka iskuullada iyo jaamacadaha, waa in sida ugu macquulsan looga fogaadaa in ay ku sugnaadaan gudaha xarumahaasi, si aan loo soo weerarrin isla markaana aan loo carqaladeyn jawiga waxbarashada.

**Tilmaan 6:** Waa in dhammaan dhinacyada ku lugta leh colaadaha hubaysan ay sida ugu macquulsan oo ugu haboon tilmaamahan ugu daraan dhaqanka ciidankooda, buugaagta milateri, shuruucda iska horimaadka, awaamirta hawlgalka, iyo qaababka kale ee lagu gudbin karo, si taliyayaasha ay ugu faafiyaan qaabka ugu wanaagsan. Waa in dhinacyada ku lugta leh colaadda ay go'aansadaan habka ugu wanaagsan ee ay sidaa ku samayn karaan.

# LIFAAQ 2: BAYAANKA BADQABKA ISKUULLADAC[91]

***Bayaanka Badqabka Iskuullada ayaa waxaa lagu diyaariyay wadaxaajood ayay dalalka yeesheen, oo garwadeen ka ahaayeen Norway iyo Argentina kaasoo lixdii bilood ee ugu horreysay 2015 ka dhacay magaalada Geneva, waxaana uu wadamada fursad u siiyaa inay taageero u muujiyaan difaacidda iyo sii socoshada waxbarashada ee xilliyada ay colaaddu jirto, waana mid u sahlaya dalalka inay ansixiyaan oo ay meelmariyaan Tilmaamaha Ka Hortagga In Ciidamada Ay Iskuullada Iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Ay Dagaalladu Socdaan. Bayaanka ayaa ansixintiisa lagu soo bandhigay Shirka Badqabka Iskuullada ee 29-kii Mey 2015 ka dhacay magaalada Oslo.***

Saamaynta ay colaadda hubaysan ku yeelato waxbarashada ayaa dhalisa caqabado waaweyn oo ah dhinacyada bani'aadannimada, hormarka iyo guud ahaan bulshada. Caalamka oo dhan, waxaa qaraxyo, duqeyn iyo gubitaan lala beegsaday iskuullada iyo jaamacadaha, halka carruurta, ardada, macallimiinta iyo aqoonyahannadana loo geystay dil, dhaawac, afduub iyo xarig aan loo meel dayin. Dhinacyada ku lugta leh colaadda ayaa xarumaha waxbarashada u adeegsaday saldhigyo ciidan ama xabsiyo. Falalkaasi ayaa khatar usoo jiida carruurta iyo ardada, gaar ahaan xuquuqda ay u leeyihiin waxbarashada, waxaana ay bulshada ka luminayaan asaaska ay ku dhisan karto mustaqbalkeeda. Dalal badan ayaa colaadaha waxa ay weli burburinayaan iskuullada iyo sidoo kale rajada iyo himilada jiil dhan oo carruur ah.

Weerarrada ka dhanka ah waxbarashada ayaa waxaa ka mid ah dhibaatooyinka loo geysto xarumaha tacliinta, ardada iyo shaqaalaha. Weerarrada ama hanjabaaddooda ayaa dhibaato ba'an oo muddo dheer qaadata ku reebi kara shakhsiyaadka iyo bulshada. Waxaa hakad geli kara helitaanka waxbarashada; waxaana la joojin karaa shaqada xarumaha waxbarashada ama waxaaba ka maqnaan kara ardada iyo shaqaalaha ee u baqaya ammaankooda. Weerarrada ka dhanka ah iskuullada iyo jaamacadaha ayaa loo adeegsaday in lagu muujiyo faquuq iyo dulqaad la'aan – si loo kordhiyo takoorka ku salaysan jinsiga, tusaale ahaan in gabdhaha laga joojiyo waxbarashada, colaad laga dhex abuuro beelaha qaar, la xaddido kala duwanaanta dhaqanka iyo in la diido xorriyadda waxbarashada iyo xaqa ku biiridda urur. Marka xarumaha waxbarashada loo adeegsado ujeedooyin ciidan, ayaa taasi waxa ay kordhin kartaa khatarta ah in dhinacyada dagaallamaya ay qortaan oo ay adeegsadaan carruurta, ama ay ka dhigaan kuwo u nugul tacaddiyada galmada ama in laga faa'iideysto. Si gaar ahna waxa ay sare ugu qaadi kartaa in weerar lala beegsado xarumaha waxbarashada.

Taa bedelkeeda, waxbarashada ayaa carruurta iyo dhalinyarada ka difaaci karta dhimashada, dhaawaca iyo in laga faa'iideysto; waxaana ay ka khafiifin kartaa saamaynta colaadda, ayadoo siinaysa xasillooni iyo helitaanka adeegyada kale ee muhiimka ah. Waxbarashada la jaanqaadi karta colaadda ayaa ah mid aan sii hurin balse qeyb ka qaadata nabada. Waxbarashada ayaa muhiim u ah hormarka iyo helitaanka xuquuqda aadanaha iyo xorriyadaha kale. Waxaan inta karaankeena ah ku dadaalaynaa sidii aan uga dhigi lahayn goobaha waxbarashada kuwo ammaan ah.

Waxaan soo dhaweynaynaa hindisayaasha dalalka ee lagu hormarinayo, laguna difaacayo xaqa waxbarashada iyo fududeynta in ay sii socoto xilliyada ay colaaddu jirto. Sii socoshada waxbarashada ayaa bulshada wajahaysa colaadda u sahli karta inay hesho macluumaad noolasheeda muhiim u ah, sida tan caafimaadka, iyo weliba talooyin ku aaddan khatarta kusoo foolka leh.

Waxaan bogaadineynaa hawsha uu Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ka qabtay carruurta iyo colaadaha, waxaana garawsannahay muhiimada uu leeyahay hannaanka dusha kala socoshada iyo ka warramida ee tacaddiyada waaweyn ee ka dhanka ah carruurta ku nool goobaha colaaddu ka jirto. Waxaan carrabka ku adkeyneynaa muhiimada ay leeyihiin qaraarrada Golaha Ammaanka ee tirsigoodu yahay 1998 (2011), iyo 2143 (2014) kuwaasoo ugu baaqayaa dhammaan dhinacyada ku lugta leh colaadda inay ka baaqsadaan falalka dhibaateyn kara in carruurta ay helaan waxbarasho, isla markaana ku dhiiragelinaya dalalka xubnaha ka ah inay qaadaan tallaabooyin wax ku ool ah oo looga hortagayo in ciidamada dowladda ama kuwa aan dowliga ahayn ay iskuullada u adeegsadaan si khilaafsan sharciga caalamiga ah.

Waxaan soo dhaweyneynaa diyaarinta *Tilmaamaha ka hortagga in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu socdaan.* Tilmaamahan ayaan sharci ahayn, isla markaana aan saamayneyn

shuruucda caalamiga ah ee jira. Waxaa laga soo qaatay qaababka wanaagsan ee ay dalalka qaar ku dhaqmaan hadda, waxaana looga gol leeyahay in lagu yareeyo saamaynta ay colaadaha hubaysan ku reebi karaan waxbarashada. Waxaan soo dhaweyneynaa dadaallada lagu faafinayo tilmaamahan, isla markaana ay ku dhaqan gelinayaan ciidamada, xooggaga hubaysan ee dhinacyada kale ee ay khuseeyaan.

Anaga oo aqoonsan xaqa waxbarashada iyo dowrka ay tacliinta ka qaadan karto hormarinta isfahanka, dulqaadka iyo saaxiibtinnamada dalalka dhexdooda ah; ayna naga go'an tahay inaan xoojinno difaaca dadka rayidka ah ee ku nool deegaannada ay colaaddu ka jirto, gaar ahaan carruurta iyo dhalinyarada; isla markaana go'aansannay inaan ka wada shaqeyno badqabka iskuullada, ayaa waxaan ansixineynaa *Tilmaamaha ka hortagga in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu socdaan,* waxaana:

- ➢ Adeegsaneynaa *Tilmaamaha*, waxaana sida ugu macquulsan, uguna haboon aan uga daraynaa siyaasadaha gudaha iyo nidaamka hawlgalka;
- ➢ Ku dadaalaynaa inaan si heer qaran ah u ururino macluumaadka muhiimka ah ee ku aaddan weerarrada ka dhanka ah xarumaha waxbarashada, anaga oo adeegsaneyna qaababka dusha kala socoshada iyo ka warramida ee jira; si aan u fududeyno ururinta macluumaadka; iyo in si aan kala sooc lahayn u caawinno dhibbanayaasha;
- ➢ Baaraynaa eedeymaha tacaddiyada ku xusan shuruucda qaran iyo kuwa caalamiga ah, ayadoo qaabka ugu haboon loo maxkamadeynayo dadka galay tacaddiyadaasi;
- ➢ Diyaarin doonnaa, hirgelin doonnaa isla markaana hormarin doonnaa nidaamka waxbarashada la jaanqaadi karta colaadda ee mashaariicda caalamiga ah ee bani'aadannimada iyo hormarinta, iyo kuwa heerka qaran;
- ➢ Ku dadaali doonnaa xaqiijinta sii socoshada waxbarashada ee xilliyada colaadda, taageeri doonnaa in dib loo furo xarumaha waxbarashada, haddii aan taa awood u leenahay, anaga oo fududeyneyna iskaashiga iyo kaalmada caalamiga ah ee mashaariicda ka hortagaya ama ka jawaabaya weerarrada ka dhanka ah waxbarashada, oo ay ka mid tahay inaan fulino bayaankan;
- ➢ Taageeraynaa dadaallada ay wadaan Golaha Ammaanka Qaramada Midoobay ee ku aaddan carruurta iyo colaadaha, Wakiilka Gaar ah ee Xoghayaha Guud u qaabilsan Carruurta iyo Colaadaha, hay'adaha kale ee Qaramada Midoobay iyo shirkadaha; iyo
- ➢ Yeelan doonnaa kulamo joogta ah, anaga oo ku marti qaadeyno hay'adaha caalamiga ah iyo bulshada rayidka entities and agencies; and

# LIFAAQ 3: SHURUUCDA CAALAMIGA AH EE KHUSEEYA[92]

Saddex qeybood oo sharciga caalamiga ah ayaa muhiim u ah difaaca waxbarashada.

## 1.1 Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha (IHRL):

Sharcigan ayaa difaaca xuquuqda ay leeyihiin dhammaan dadka, ayadoo aan loo eegeyn isirkooda, jinsigooda, luuqadooda, diintooda, siyaasada iyo afkaarta kale ee ay aaminsan yihiin, halka ay kasoo jeedaan, hantidooda, dhalashada ama maqaam kale. Waxa uu khuseeyaa qof kasta oo ku nool dalka laga hadlayo ayna ka mid yihiin barakacayaasha gudaha iyo dadka aan dalka u dhalan (sida qaxootiga), waxaana loo adeegsan karaa xilli kasta iyo xaalad waliba. Sida uu dhigayo sharcigan, waxaa waajib ku ah dowladaha iyo dhinacyada kale inay xurmeeyaan, difaacaan, ayna fuliyaan xuquuqda ay dadka u leeyihiin waxbarashada. Dal kasta oo caalamka ah ayaa qaab un u saxiixay sharcigan. Waxaa jira tiro heshiisyo caalami ah iyo kuwo heer gobol ah oo ku aaddan xuquuqda waxbarashada. Heshiiska ay dalalka ugu badan saxiixeen[93] (194 dal, marka laga reebo Maraykanka) ayaa ah Axdiga Caalamiga ah[94] ee Xuquuqda Carruurta 1989 (CRC).

### Axdiga Xuquuqda Carruurta, Qodobka 28

1. Dalalka saxiixay waxa ay aqoonsan yihiin xaqa uu canuga u leeyahay waxbarashada, si taa looga guulgaaro ayadoo lagu salaynayo fursado siman, waa in dalalka ay si gaar ah:

(a) Uga dhigaan waxbarashada dugsiga hoose mid qasab ah, bilaash ah, ayna dadka oo dhan heli karaan;

(b) U dhiirageliyaan noocyo kala duwan ee waxbarashada dugsiga sare ah, gaar ahaan mid guud iyo mid tababar xirfadeed ah, uuna heli karo canug kasta, iyo inay qaadaan tallaabooyinka ku haboon ee waxbarashadaasi looga dhigi karo bilaash, iyo in kaalmo dhaqaale la siiyo kuwa u baahan;

(c) Uga dhigaan waxbarashada sare mid ay dadka oo dhan heli karaan, sida ku haboonna ugu salaysan awooddooda;

(d) Uga dhigaan macluumaadka ku saabsan waxbarashada iyo tababarka kuwo ay heli karaan carruurta oo dhan;

(e) U qaadaan tallaabooyin ay ku dhiiragelinayaan dhigashada iskuullada, si loo yareeyo tirada carruurta ka haraysa waxbarashada.

### Axdiga Xuquuqda Carruurta, Qodobka 29

1. Dalalka saxiixay ayaa ku heshiiyay in waxbarashada canuga lagu jiheeyo:

(a) Hormarinta shakhsiyaddiisa, awooddiisa jismi, maskaxeed iyo hibadiisa;

(b) Ixtiraamka xuquuqda aadanaha iyo xorriyadaha asaasiga ah, iyo mabaadii'da ku xusan Xeerka Qaramada Midoobay;

(c) Xurmeynta waalidka carruurta, dhaqanka, luuqada iyo qiyamka dalka uu ku nool yahay iyo kan uu kasoo jeedo, iyo xadaaradaha ka duwan kuwiisa;

(d) U diyaarinta canuga inuu si mas'uulnimo ah ugu dhex noolaado bulsho xor ah, oo ku dhisan isfahan, nabad, dulqaad, sinaanta jinsiga, saaxiibtinnimo ka dhexeysa dadka oo dhan, qowmiyadaha, ururada wadaniga ah, kuwa diimaha iyo dadka kasoo jeeda qowmiyadaha hore.

Sidoo kale eeg Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaalaha, Bulshada, iyo Dhaqanka (ICESCR), Qodobka 1395, kaasoo sidoo kale dhigaya xaqa uu qofkasta u leeyahay waxbarashada – ma aha carruurta oo keliya– iyo dhammaan heerarka waxbarashada. ICESCR ayaa waxaa saxiixay 160 wadan.

## 1.2 Sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadannimada (IHL):

IHL waa shuruuc la isugeeyay oo nidaamiya hab-dhaqanka dhinacyada ku lugta leh colaadda hubaysan. Waxa uu khuseeyaa dhammaan dhinacyada dagaallamaya, sida ciidamada dowladda iyo kuwa aan dowliga ahayn. Waxaa sidoo kale ku jira qodobo si gaar ah u difaacaya waxbarashada, xarumaheeda, shacabka, iyo weliba carruurta, balse si gaar ah uma xusayo "xuquuqda waxbarashada."

## 1.3 Sharciga Caalamiga ah ee dembiyada (ICL):

ICL ayaa aqoonsada xaaladaha soo jiidaya mas'uuliyadda dembiga iyo ku xadgudubkiisa. Si cad ayuu u difaacaa goobaha waxbarashada asagoo: dembi ka dhigaya falalka "sida ula kaca ah weerarrada loogula beegsanayo dhismayaasha gaarka u ah waxbarashada, haddii aanay ahayn kuwo loo adeegsanayo ujeedooyin milateri;" ka difaacaya ardada iyo shaqaalaha waxbarashada dilalka sharci darrada ah, jirdilka, tacaddiyada galmada, in ardada loo qorto askar ahaan, iyo asagoo dembi ka dhigaya dilalka iyo dhiiragelinta xasuuqa.

**Xiriirka ka dhexeeya Tilmaamaha Ka Hortagga In Ciidamada Ay Iskuullada Iyo Jaamacadaha Adeegsadaan Xilliyada Ay Dagaalladu Socdaan, Bayaanka Badqabka Iskuulka, iyo Sharciga Caalamiga ah**

Tilmaamaha ma ahan kuwo iskood sharci u ah, balse waxa ay kabaan sharciga caalamiga ah ee jira. Sida ku cad sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadannimada, iskuullada iyo jaamacadaha ayaa sida caadiga ah loo arkaa inay yihiin goobo shacab, weerar si bareer ah loogu geystana waxa uu ka dhigan yahay dembi dagaal. Haseyeeshee, goobaha shacabka ayaa waxaa loo bedeli karaa kuwo milateri, taasoo ka dhigaysa in si sharci ah uu u beegsan karo dhinaca kale. U adeegsiga ujeedooyinka milateri ayaa sida caadiga ah ka dhigaya iskuullada iyo jaamacadaha xarumo milateri. Waxaa xilli kasta looga baahan yahay dhinacyada dagaallamaya inay si joogta ah saamaynta weerarrada uga difaacaan shacabka iyo hantidiisa, ayna markasta maanka ku hayaan khasaaraha ka dhalan kara adeegsiga xarumaha shacabka, marka loo eego faa'iidada milateri ee ay ka helayaan.

Ujeedada ugu weyn ee Tilmaamaha ayaa ah in laga hortago khatarta imaan karta marka ay ciidamada iyo xooggaga hubaysan iskuullada iyo jaamacadaha u bedelaan xarumo milateri, taasoo usoo jiidi karta weerarro khasaaro badan dhaliya.

Waxaa intaa dheer in sida ku xusan Sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadannimada, dhinac kasta oo qeyb ka ah colaadda looga baahan yahay inuu shacabka ka raro deegaannada u dhaw xarumaha ciidan. Sidaa darteed, waxaa sharci darra ah in iskuullada isku mar loo adeegsado saldhig milateri, goob hubka laga rido iyo xarun waxbarasho. Bayaanka Badqabka Iskuullada ayaa sidoo kale ah dukumiinti aan sharci ahayn. Waa qaab ay dalalku ku ansixin karaan, kuna adeegsan karaan Tilmaamaha. Bayaanka ayaa waxaa ku jira ballanqaadyo dheeraad ah oo si wanaagsan loogu difaacayo waxbarashada xilliyada ay jirto colaadda hubaysan.




**Maalinka koobaad ee iskuul ammaankiisa aad loo sugay, xilli iskuullada furmeed ka dib fasax dheer oo ay dowladda Pakistan siisay kaasoo ka dambeeyay weerar ay mintidiin ku qaadeen iskuul ku yaal Peshawar 16-kii Disembar 2014.**

*© 2014 Rana Sajid Hussain/Pacific Press/LightRocket via Getty Images*

# TIXRAAC

1 PEIC iyo BIICL, Difaaca Waxbarashada ee Xaaladaha Amni Darrada iyo Colaadda: Buugga gacanta ee Sharciga Caalamiga ah (PEIC &BIICL, 2012), 4. Koobitaanka waxaa laga heli karaa: http://www.biicl.org/documents/36_protecting_education_summary.pdf.

2 Kooxda Caalamiga ah ee Waxbarashada, Buugga 1: Guudmar, Difaaca Waxbarashada Dalalka ay Colaaddu Saamaysay (Kooxda Caalamiga ah ee Waxbarashada, 2010), 10. Waxaa laga heli karaa: http://www.protectingeducation.org/sites/default/files/documents/cluster_booklet_1_-_overview.pdf.

3 UNESCO, Waxbarashada Dadka oo dhan, Warbixinta Kormeerka Caalamiga ah2015 (UNESCO, 2015), 266. Boqolkiiba sodon iyo lix ka mid ah 58 milyan ee carruurta gaartay da'da iskuulka oo aan waxbaran, ayadoo lagu saleeyay xogta 2012. http://en.unesco.org/gem-report/.

4 GCPEA, Weerarrada Lagu Hayo Waxbarashada 2014 (GCPEA, 2014), 8. Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/files/documents/eua_2014_full_0.pdf.

5 Isla masdarka. 14.

6 Isla masdarka. 8.

7 GCPEA, Casharrada Dagaalka 2015 (GCPEA, 2015), 6. Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/files/documents/lessons_in_war_2015.pdf.

8 GCPEA, Weerarrada Lagu Hayo Waxbarashada 2014 (GCPEA, 2014), 19-20. Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/files/documents/eua_2014_full_0.pdf.

9 GCPEA, Casharrada Dagaalka 2015 (GCPEA, 2015), 35-39. Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/files/documents/lessons_in_war_2015.pdf.

10 Waa in qaabka la jaanqaadi kara jinsiga lagu daraa dhammaan todobada qeybood ee tallaabooyinka. Qaabka la jaanqaadi kara jinsiga ee samaynta siyaasadaha iyo qorsheynta waxbarashada xaaladaha colaadda, eeg: Macluumaadka Hagidda ee Waxbarashada Dareensan Colaadda (INEE, 2013) Waxaa laga heli karaa: http://s3.amazonaws.com/inee-assets/resources/INEE_GN_on_Conflict_Sensitive_Education.pdf

11 Bayaanka Badqabka Iskuullada ayaa waxa uu dalalka fursad u siiyaa inay taageero ballaaran u muujiyaan difaaca iyo sii socoshada waxbarashada ee xaaladaha colaadda, waana qaab ay dalalka ku ansixin karaan kuna hirgelin karaan Tilmaamaha ka hortagga in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu socdaan. Eeg: Lifaaq II.

12 Tilmaamaha ka hortagga in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu socdaan ayaa hagid wanaagsan u noqon kara ciidamada dowladaha iyo kuwa aan dowliga ahayn ee qorshayna ama fulinaya hawlgallada milateri, ayagoo looga gol leeyahay in lagu wanaajiyo ka hortagga in dhinacyada hubaysan ay iskuullada iyo jaamacadaha u adeegsadaan ujeedooyin milateri. Eeg: Lifaaq I.

13 Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada ayaa ku micneeya weerarrada ka dhanka ah waxbarashada adeegsiga awood ama u hanjabida ula kaca ah— ee loo fuliyo sababo siyaasadeed, milateri, caqiido, firqo, qowmiyadeed, diin, ama dembi— oo ka dhan ah ardada, macallimiinta iyo xarumaha waxbarashada

14 Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada ayaa ku micneeya "adeegsiga milateri" falal kala duwan oo ay dhinacyada hubaysan ka fuliyaan gudaha xarumaha waxbarashada, si kumeelgaar ah ama waqti badan. Eeg GCPEA, Casharrada Dagaalka 2015 (GCPEA, 2015) New York: GCPEA. Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/files/documents/lessons_in_war_2015.pdf.

15 Liiska su'aalaha waxaa laga soo qaatay PEIC, UNESCO-IIEP and IBE, badqabka, adkeysiga, iyo isku duubnida bulshada: Hagaha Dadka Qorsheeya Waaxda Waxbarashada: Buugga 2: Falanqeyn: Xaggeen hadda ku suganahay? 4 iyo 11; iyo buugga 6: Kormeerka iyo Qiimeynta: Sideen ku ogaan karnaa waxa aan samaynay? (PEIC, UNESCO-IIEP iyo IBE, 2015). Dhammaan buuggaga ayaa laga heli karaa: http://education4resilience.iiep.unesco.org/en/planning.

16 Shaqaalaha waxbarashada waxaa ka mid ah macallimiinta, mas'uuliyiinta waxbarashada, dhammaan noocyada shaqaalaha taakuleynta, xubnaha ururka shaqaalaha ee macallimiinta. Micnaha GCPEA, Ka Difaacidda Shaqaalaha Waxbarashada Weerarrada Lagula Beegsado Dalalka ay Colaadda Saamaysay, (GCPEA, 2014), 7. Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/files/documents/protecting_education_personnel.pdf.

17 Adkeysiga waxaa lagu fasiray awoodda ay bulshada u leedahay inay filato, iska celiso, kana soo kabato cadaadiska ama dhibaatooyinka (dabiici iyokuwa uu aadanaha sababay). Eeg: UNICEF. (2014). Aqoonta nabad dhiska, Dabeecadda, iyo Xirfadaha: Dib-u-eegista iyo talooyinka. New York: UNICEF.

18 Si aad macluumaad faahfaahsan uga hesho Hannaanka Dusha Kala Socoshada iyo ka warramida Qaramada Midoobay (UN MRM), qeybta sida gaarka ah looga hadlayo ee bogga 12 ee warbixintan.

19 Baaritaanka waaxda waxbarashada ayaa u sahla dadka go'aanka leh inay aqoonsadaan awoodda iyo dhaciifnimada hannaanka, dusha kala socoshada guulaha la gaaray, iyo helitaanka siyaasadda ugu wanaagsan waxbarashada. Eeg: https://www.iipe-poledakar.org/sites/default/files/fields/publication_files/ edu_sector_analysis_guide_v1_en_low_def_final.pdf.

20 Hannaanka Maareynta Macluumaadka Waxbarashada (EMIS) ayaa loogu talagalay in lagu maareeyo xogta waxbarashada. Waa qaab lagu ururiyo, qiimeeyo, oo lagu gudbiyo xogta waxbarashada, gaar ahaan iskuullada, ardada, macallimiinta iyo shaqaalaha. Waxaa macluumaadkaasi adeegsada Wasaaradda Waxbarashada, Hay'adaha aan dowliga ahayn, cilmi-baarayaasha, deeq-bixiyayaasha, iyo dhinacyada kale ee ay khuseyso waxbarashada si loo abuuro tilmaamo lagu kormeero shaqada nidaamka waxbarashada iyo maareynta dhaqaalaha loo qoondeeyay waxbarashada. Hannaanka EMIS ayaa shuruud muhiim ah u noqonaya dowladaha si ay dusha ugala socdaan una qiimeeyaan hormarka ay ka sameeyeen dhinac kasta oo waxbarashada ah. Qaab loogu magac daray OpenEMIS ayaa waxaa samaysay hay'adda UNESCO waana mid ay si bilaash ah u adeegsan karaan dhammaan dalalka xubnaha ka ah. See: https://www.openemis.org/See also: http://unesdoc.unesco.org/images/0013/001323/132306e.pdf.

21 Si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho hagidda dusha kala socoshada iyo qiimeynta badqabka iskuullada, adkeysiga iyo isku duubnida bulshada— oo ay ku jiraan liis dhowr tilmaamo ah— eeg: http://education4resilience.iiep.unesco.org/en/node/113.

22 Kooxda Waxbarashada oo 2007 uu sameeyay guddi joogta ah oo ka kooban hay'addo kala duwan, ayaa ah madal furan oo isu keenta hay'adaha aan dowliga ahany, kuwa Qaramada Midoobay, aqoonyahanno, iyo hawlwadaagayaal kale oo heer caalami, qaran iyo gobol ah, si waxbarasho siman loo gaarsiiyo shucuubta ay saameeyeen xasaradaha bani'aadannimo. Macluumaad dheeraad ah ka eeg: http://educationcluster.net.

23 Si la mid ah tan kore, Kooxda Difaaca ayaa hormarisa isuduwidda ka jawaab-celinta dhinacyada bani'aadannimada, xuquuqda aadanaha iyo hormarinta, si wax looga qabto xaaladaha degdega ah iyo musiibooyinka. Macluumaad dheeraad ah ka eeg http://www.globalprotectioncluster.org/en/about-us/who-we-are.html.

24 Si aad faahfaahin dheeraad ah uga hesho qaababka wadatashiga iyo qiimeynta, eeg PEIC, UNESCO-IIEP iyo IBE, badqabka, adkeysiga, iyo isku duubnida bulshada: Hagaha Dadka Qorsheeya Waaxda Waxbarashada: Buugga 2: Falanqeyn: Xaggeen hadda ku suganahay? 12, 13 iyo 19. Dhammaan buuggaga ayaa laga heli karaa: http://education4resilience.iiep.unesco.org/en/planning.

25 Si aad faahfaahin dheeraad ah uga hesho ururinta macluumaadka ee qiimeynta baahida degdega ah ee waxbarashada xaaladaha colaadda, eeg USAID, Hagaha Qiimeynta Baahida Degdega ah: Waxbarashada Dalalka ay Saameeyeen Colaadda iyo Xasaradaha (USAID, 2014) 17-19. Waxaa laga heli karaa: https://www.usaid.gov/what-we-do/education/educating-children-and-youth-crisis-and-conflict-situations/Rapid-Needs-Assessment-Guide-Education.

26 Kala qeybiyayaasha waa waxyaabaha xiisadda ka dhex abuura dhinacyada bulshada, sida nidaamka iyo hay'adaha; dabeecadda iyo ficillada; qiyamka iyo danaha; khibradaha; ama astaamaha iyo dhacdooyinka. Waxaa laga soo xigtay: Anderson, M. Dhibaato ha geysan: Sida Gargaarka Uu U Taageeri Karo Dagaalka ama Nabada (Lynne Rienner Publishers: Boulder, 1999), 31-35.

27 Luuqada looga hadlo qeybtan ayaa ah mid ay koox adeegsadaan, maadaama la filayo in Wasaaradda ay qiimeynteeda ku salaynayso dad badan.

28 Isku xirayaasha ayaa loola jeedaa waxyaabaha isu keena dhinacyada bulshada sida nidaamka iyo hay'adaha; dabeecadda iyo ficillada; qiyamka iyo danaha; khibradaha; ama astaamaha iyo dhacdooyinka. Waxaa laga soo xigtay: Anderson, M. Dhibaato ha geysan: Sida Gargaarka Uu U Taageeri Karo Dagaalka ama Nabada (Lynne Rienner Publishers: Boulder, 1999), 31-35.

29 Wasaaradda Waxbarashada ee Federaalka Itoobiya, Barnaamijka hormarinta waaxda waxbarashada IV 2010-2015 (MoE Ethiopia, 2010), 83-85 waxaa laga eegay 18-kii Febraayo 2015 http://www.globalpartnership.org/content/ethiopia-education-sector-development-program-iv-2010-2015.

30 Waraysi lala yeeshay Esther Akumu, Agaasimaha Hawlwadaagayaasha hormarinta ee Wasaaradda Waxbarashada, Sayniska iyo Tiknoolajiyadda ee Suudaanta Koonfureed, 16-kii Abrill 2015.

31 Qiimeynta khatarta ayaa lagu eegaa falalka khatarta keeni kara si looga hortago, loo yareeyo ama looga jawaab-celiyo. Waxaa lagu eegaa su'aallo ay ka mid yihiin: Maxaa khaldami kara? Maxay tahay suuragalnimada inay wax khaldamaan? Maxaa saamayn ah oo soo gaari karta dadka, qaabka kormeerka iyo waxbarashada haddii ay wax khaldamaan?

32 Tilmaamo dheeraad ah oo ku aaddan qaabka lagu samayn karo nidaam dusha kala socosho oo ammaan iyo qarsoodi ah waxaa laga heli karaa barta internet-ka ee UN MRM: http://www.mrmtools.org/mrm/1095_1122.htm.

33 Sida lagu xusay PEIC, UNESCO-IIEP iyo IBE, badqabka, adkeysiga, iyo isku duubnida bulshada: Hagaha Dadka Qorsheeya Waaxda Waxbarashada: Buugga 2: Falanqeyn: Xaggeen hadda ku suganahay? (PEIC and UNESCO-IIEP iyo IBE, 2015), 5-6. Dhammaan buugaagta waxaa laga heli karaa: http://education4resilience.iiep. unesco.org/en/planning.

34 Bilal Al Hamaydah, Jo Kelcey, iyo Ferran Lloveras, Falastiin: Casharrada laga bartay barnaamijka yareynta khatarta musiibooyinka ee UNESCO ay ka fulisay Gaza (UNESCO, IIEP iyo PEIC, 2015) waxaa laga heli karaa: http://education4resilience.iiep.unesco.org/en/node/959. Waraysi lala yeeshay Bilal Al Hamadayah 22-kii Juun 2015.

35 Si aad faahfaahin dheeraad ah uga hesho tusaalooyinka iyo sharraxaada fulinta barnaamijka yareynta khatarta musiibooyinka ee UNESCO ay ka fulisay Gaza eeg daraasada xaalad ee ku taal bogga 24 ee dukumiintigan.

36 Eeg: Dukumiintiga GCPEA, Su'aalaha iyo jawaabaha ku aaddan Tilmaamaha ka hortagga in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu socdaan (GCPEA, 2015), 14. Waxaa laga heli karaa: http://www.protectingeducation.org/sites/default/files/documents/questions_and_answers.pdf.

37 Waxaa laga soo xigtay liiska PEIC, UNESCO-IIEP iyo IBE, badqabka, adkeysiga, iyo isku duubnida bulshada: Hagaha Dadka Qorsheeya Waaxda Waxbarashada: Buugga 2: Falanqeyn: Xaggeen hadda ku suganahay? (2015) 5-6 Dhammaan buugaagta waxaa laga heli karaa: http://education4resilience.iiep.unesco.org/en/planning. Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah, eeg GCPEA, Daraasad ku salaysan tallaabooyinka waxbarashada looga difaacayo weerarrada (2011), 11. Waxaa laga heli karaa: http://www.protectingeducation.org/promoting-programmatic-measures-prevention-and-protection.

38 Liiskan waxaa laga soo xigtay UNESCO et al., Badqabka Wax ku oolka ah ee Iskuullada (Maarso 2013), 4. Waxaa 2-dii Juun 2015 laga eegaya http://www.unesco.org/new/fileadmin/MULTIMEDIA/HQ/SC/pdf/Comprehensive_school_safety.pdf.

39 Waxaa laga heli karaa: http://www.ifc.org/wps/wcm/connect/8b796b004970c0199a7ada336b93d75f/DisERHandbook.pdf?MOD=AJPERES.

40 Maamulka Punjab, Waaxda Arimaha Gudaha NO.SO (IS-II) 3-3/09/2014 laga soo saaray Lahore, 16-kii Disembar 2014 sida lagu xusay Aduun Iskuul ah, Hinidisaha Badqabka Iskuullada: Difaaca Xuquuqda Waxbarashada ee Pakistan (Adduun Iskuul ah iyo Isbahaysiga Ganacsiga Caalamiga ah ee Waxbarashada, 2015), 9. Waxaa laga heli karaa: http://b.3cdn.net/awas/17f0a8f0c750d6704c_mlbrgn5qs.pdf.

41 Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/files/documents/protecting_education_personnel.pdf.

42 Tirada ay soo gudbisay Wasaaradda Waxbarashada bishii Abriil 2013, ayadoo adeegsanaysa xogta Wasaaradda Shaqaalaha oo uu hagaajiyay barnaamijka madaxtooyada ee Xuquuqda Aadanaha iyo Sharciga Bani'aadannimada; sida lagu xusay dukumiintiga GCPEA ee Weerarrada ka dhanka ah waxbarashada 2014 (GCPEA, 2014), 126. Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/files/documents/eua_2014_full_0.pdf.

43 Tusaalayaasha amarrada Ministerio de Educacion Nacional Republica de Colombia ee la xiriira difaaca macallimiinta, eeg qaraanka 1240, 3 Maarso 2010; qaraarka 3900, 12 Mey 2011; Amarka 1628, 31 July 2012.

44 Mario Novelli, "Dagaallada Fasalka ee Colombia: Rabshadaha Siyaasadeed ee ka dhanka ah Ururada Shaqaalaha ee Waaxda Waxbarashada " (Education International, 2009), 23-27; Jamhuuriyadda Colombia, Warbixinta Xuquuqda Shaqaalaha (2011), 27. Waxaa laga heli karaa: http://download.ei-ie.org/Docs/WebDepot/EI_ColombiaStudy_ eng_final_web.pdf.

45 Isla masdarka.

46 EDC. Adeegsiga waxbarashada raadiyaha lagu gudbiyo ee Soomaaliya (EDC, 2011). Waxaa laga eegay 1-dii Juun 2015 barta internetla: http://idd.edc.org/sites/idd.edc.org/files/EDC%20Education%20in%20Fragility%20Series-Somalia%20SIRIP.pdf. Waraysi lala yeeshay Sarah Noguiera-Sanca, EDC, 2-dii Juun 2015.

47 Aduun Iskuul ah, 2014 Hinidisaha Badqabka Iskuullada: Difaaca Xuquuqda Waxbarashada ee Nigeria. http://b.3cdn.net/awas/b677a93ebf1c8cf36b_1wm6b3w6i.pdf. Macluumaadk dheeraad ah oo ku saabsan Hindisaha Badqabka Iskuullada, eeg: http://lcn.pascalobservatory.org/pascal-now/blogentry/associate-features/introducing-safe-schools-initiative-ssi-nigeria.

48 Eeg: http://protectingeducation.org/sites/default/files/documents/eua_2014_country_profiles_nigeria.pdf.

49 Tusaale ahaan, eeg daraasad xaaladda Filibiin ee GCPEA, Ka Difaacidda Shaqaalaha Waxbarashada Weerarrada Lagula Beegsado Dalalka ay Colaadda Saamaysay (GCPEA, 2014), 41.

50 Tusaale ku aaddan barnaamijka dhaqaala siinta waxbarashada qaran ee xaaladaha degdega ah, eeg Waaxda Dhaqaala Siinta Waxbarashada Maraykanka ee Iskuullada Gobollada iyo Maareynta Xaaladaha Degdega ah: http://www2.ed.gov/programs/schlemergmgt-sea/index.html.

51 Waxaa laga soo xigtay Kenneth S. Trump, Ammaanka Iskuulka ee Wax ku oolka ah iyo Qorshaha U Diyaargarowga Xaaladaha Degdega ah (Corwin Sage Company: California, 2011), 205.

52 Bilal Al Hamaydah, Jo Kelcey, iyo Ferran Lloveras, Falastiin: Casharrada laga bartay barnaamijka yareynta khatarta musiibooyinka ee UNESCO ay ka fulisay Gaza (UNESCO, IIEP iyo PEIC, 2015) waxaa laga heli karaa: http://education4resilience.iiep.unesco.org/en/node/959. 34

53 Heerarka Ugu Hooseeya ee Waxbarashada Xaaladaha Degdega ah ee INEE, waxaa laga heli karaa: http://toolkit.ineesite.org/toolkit/INEEcms/uploads/1012/INEE_GuideBook_EN_2012 LoRes.pdf.

54 Kooxda Waxbarashada Cote d'Ivoire, "Attaques Contre l'Education: Report sur l'impactde la crise sur la systeme educatif Ivoirien, Rapport Numero 2" (2011), 3; sida lagu soo xigtay GCPEA, Dowrka Bulshooyinka ee Ka Difaacidda Waxbarashada Weerarrada: Casharrada La Bartay (GCPEA, 2014), 25. Waxaa laga heli karaa: http://www.protectingeducation.org/sites/default/files/documents/the_role_of_communities_in_protecting_education_ from_attack.pdf.

55 Isla Masdarka.

56 Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan qaraarradan iyo kuwa kale ee leh nidaamka Dusha Kala Socoshada iyo Ka Warramidda Tacaddiyada waaweyn ee ka dhanka ah carruurta ku sugan goobaha colaadda, eeg: http://www.unicefinemergencies.com/downloads/eresource/docs/2.6%20Child%20Protection/ MRM%20Guidelines%20English.pdf.

57 Oshcard Kousassi Kouadio, "La xaajoodka ciidamada dowladda, Soo bandhigga Cote d'Ivoire," ee kulanka aqoon isweydaarsiga GCPEA ee lagu qabtay Phuket, Thailand 9-kii Nofembar 2011. Sidoo kale eeg: GCPEA, Warbixinta aqoon isweydaarsiga ku aaddan tallaabooyinka looga hortagi karo, lagu faragelin karo, loogana jawaab-celin karo weerarrada ka dhanka ah waxbarashada (GCPEA 2011). Waxaa laga heli karaa: http://www.protectingeducation.org/sites/default/files/documents/gcpea_report_0.pdf
Waxaa laga heli karaa: http://www.protectingeducation.org/sites/default/files/documents/the_role_of_communities_in_protecting_education _from_attack.pdf.

59 Dhammaan buugaagta taxanahan waxaa laga heli karaa: http://education4resilience.iiep.unesco.org/en/curriculum.

60 Waxaa laga heli karaa: http://education4resilience.iiep.unesco.org/en/node/937.

61 Waxaa laga heli karaa: http://toolkit.ineesite.org/inee_advocacy_materials_and_peace_education_programme/peace_education_programme.

62 Waxaa laga heli karaa: http://learningforpeace.unicef.org/tag/emerging-issues/.

63 Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tacliinta iyo colaadda, eeg USAID, Macluumaadka Hagaya Tacliinta iyo Colaadda ee deegaannada ay xasaradaha ka taagan yihiin (USAID, 2014).

64 Si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho tallaabooyinka lagu xaqiijinayo in dhammaan dadka ay helaan waxbarasho, eeg macluumaadka hagaya waxbarashada dareensan colaadda ee INEE (INEE, 2013), 25, 46. Waxaa laga heli karaa: http://www.ineesite.org/en/resources/inee-guidance-note-on-conflict-sensitive-education. Sidoo kale eeg UNICEF, Dareensanaanta Colaadda iyo Nabad dhiska ee UNICEF: Macluumaadka farsamada (UNICEF, 2012). Waxaa laga heli karaa: http://learningforpeace.unicef.org/resources/conflict-sensitivity-and-peacebuilding-in-unicef/.

65 Liiska waxbarashada colaadda dareensan ayaa waxaa laga soo xigtay Macluumaadka Hagaya Waxbarashada Colaadda Dareensan ee INEE (INEE, 2013), 35. Waxaa laga heli karaa: http://www.ineesite.org/en/resources/inee-guidance-note-on-conflict-sensitive-education; waxaana sidoo kale laga soo xigtay Midowga Hay'ayada Arintaa ka shaqeeya , Qaabka Loo Hagayo Dareensanaanya Colaadda (2012), 42-44. Waxaa laga heli karaa at: http://www.conflictsensitivity.org/content/how-guide.

66 GCPEA, Weerarrada Lagu Hayo Waxbarashada 2014 (GCPEA, 2014), 71. Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/files/documents/ eua_2014_full_0.pdf.

67 HRW, Bartilmaameedka Labada Dhinac: Tacaddiyada ka dhanka ah Ardada, Macallimiinta, iyo Iskuullada ku Yaal Gobollada Soohdinta Koonfureed ee Thailand. Waxaa laga heli karaa https://www.hrw.org/report/2010/09/20/targets-both-sides/violence-against-students-teachers-and-schools-thailands

68 GCPEA, Weerarrada Lagu Hayo Waxbarashada 2014 (GCPEA, 2014), 31.

69 Waxaa laga soo qoray PEIC, UNESCO-IIEP iyo IBE, badqabka, adkeysiga, iyo isku duubnida bulshada: Hagaha Dadka Qorsheeya Waaxda Waxbarashada: Buugga 2: Falanqeyn: Xaggeen hadda ku suganahay? (PEIC and UNESCO-IIEP iyo IBE, 2015), Dhammaan buugaagta waxaa laga heli karaa:http://education4resilience.iiep.un-esco.org/en/planning. Waxaad tilmaamo dheeraad ah ka heli kartaa: INEE, Hagaha Tixraaca Maalgashiga Bannaanka Uga Yimaada Waxbarashada (INEE, 2010). Waxaa laga heli karaa: http://toolkit.ineesite.org/reference_guide_on_external_education_financing; iyo GPE, Hagaha Dedejinta Taageerada Xaaladaha Degdega ah iyo kuwa Soo Kabashada Hore (GPE, 2012). Waxaa laga heli karaa: http://www.globalpartnership.org/content/guidelines-accelerated-support-emer-gency-and-early-recovery-situations.

70 Waxaa laga soo bandhigay Koorsada Barta Internet-ka ee UNESCO-IIEP 'Tallaabooyinka hufnaanta, isla xisaabtanka, iyo la dagaallanka musuq maasuqa waxbarashada' oo socday Isniintii 19-ka Oktoobat ilaa Jimcihii 4-ta Disembar 2015.

71 Guddiga hogaanka ayaa sida caadiga ah ku wanaagsan hawlaha khuseeya badqabka iskuullada iyo yareynta khatarta musiibooyinka. Waxaad faahfaahin ka heli kartaa UN-ESCO-IIEP, Kooxda Waxbarashada Caalamiga ah iyo UNICEF, Macluumaadka Haga Dadka Qorsheeya Waxbarashada: Ku darrida yareynta khatarta colaadda iyo musiibooyinka qorsheynta waaxda waxbarashada (2011), 26. Waxaa laga heli karaa: http://www.iiep.unesco.org/en/integrating-conflict-and-disaster-risk-reduction-education-sector-planning-2889.

72 Si aad faahfaahin dheeraad ah uga hesho labadan hab iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hirgelintooda, eeg qeybta todobaad ee Liiskan Waxqabadka iyo http://www.protectingeducation.org/guidelines/support.

73 UNICEF, Waxbarashada oo ah goob nabadeed: Baaq ku aaddan Suudaanta Koonfureed (UNICEF, 2014) Waxaa 22-kii Juun 2015 laga eegay http://www.unicef.org/south-sudan/media_15766.html.

74 Dhammaan buugaagta labada taxane ayaa laga heli karaa: +.

75 Tusaale ku saabsan tilmaamahaasi, ka eeg Waaxda Waxbarashada Maraykanka, Hagaha Samaynta Qorshayaasha Hawlgallada Xaaladaha Degdega ah ee Iskuullada oo tayo sare leh (2013), bogga 5-20 waxa ay ka hadlayaan qorsheynta halka bogga 56 uu ka hadlayo dadka toogashada ka dhex wada iskuullada. Waxaa laga heli karaa http://rems.ed.gov/ K12GuideForDevelHQSchool.aspx.

76 Wasaaradda Waxbarashada ee Dowladda Nepal, nidaamka qaran ee in iskuulladu yihiin goob nabadeed iyo tilmaanta fulinta 2068 (tarjumaad aan rasmi ahayn) waxaa laga heli karaa: http://www.protectingeducation.org/sites/default/files/documents/nepal_Ministry_of_education_guide-lines_on_schools_as_zones_of_peace.pdf.

77 Waxaa laga heli karaa: http://www.ineesite.org/en/minimum-standards.

78 Aduun Iskuul ah, Hinidisaha Badqabka Iskuullada: Difaaca Xuquuqda Waxbarashada ee Pakistan (Adduun Iskuul ah iyo Isbahaysiga Ganacsiga Caalamiga ah ee Waxbarashada, 2015), 9. Waxaa laga heli karaa: http://www.aworldatschool.org/news/entry/pakistan-prime-minister-sharif-backs-safe-schools-initia-tive-1589. Daraasad xaalad oo ay cilmi-baaris iyo qoraal ku samaysay Madeeha Ansari, Abriil 2015.

79 Waxaa laga soo xigtay UNICEF, Hab-raaca u ololeynta (UNICEF, 2010), 3.

80 Waxaa laga soo xigtay GCPEA, Weerarrada Lagu Hayo Waxbarashada 2014 (GCPEA, 2014), 77. Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/files/documents/eua_2014_full_0.pdf.

81 Borotokoolka saddexaad ee khiyaariga ah ee Hannaanka Xiriirka Axdiga Xuquuqda Carruurta (OP3 CRC) ayaa ah heshiis lagu sameeyay qaabka dacwad gudbinta caalamiga ah ee tacaddiyada ka dhanka ah xuquuqda carruurta. Waxaad faahfaahin dheeraad ah ka heli kartaa. : http://www.childrightsconnect.org/connect-with-the-un-2/op3-crc/.

82 Eeg: GCPEA, Faallada on Tilmaamaha ka hortagga in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu socdaan (GCPEA, 2014), 11. Waxaa laga heli karaa: http://www.protectingeducation.org/sites/default/files/documents/commentary_on_the_guidelines.pdf.

83 Waxaa laga soo xigtay GCPEA, Weerarrada Lagu Hayo Waxbarashada 2014 (GCPEA, 2014), 78. Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/ files/documents/eua_2014_full_0.pdf.

84 Waxaa laga soo xigtay GCPEA, Weerarrada Lagu Hayo Waxbarashada 2014 (GCPEA, 2014), 77. Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/ files/documents/eua_2014_full_0.pdf.

85 Eeg: Tilmaanta 4 ee Tilmaamaha ka hortagga in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu socdaan. Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/files/documents/guidelines_en.pdf

86 Waraysi lala yeeshay shaqaalaha Qaramada Midoobay, 29-kii Juun 2015. Khalad kasta oo ka muuqda tarjumidda waxaa leh qoraaga oo keliya.

87 GCPEA, Casharrada dagaalka 2015 (GCPEA, 2015), Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/files/documents/lessons_in_war_2015.pdf.

88 Waxaa laga soo xigtay GCPEA, Ka Difaacidda Shaqaalaha Waxbarashada Weerarrada Lagula Beegsado Dalalka ay Colaadda Saamayasay (GCPEA, 2014), 37-39. Waxaa laga heli karaa: http://protectingeducation.org/sites/default/files/documents/protecting_education_personnel.pdf.

89 Isla masdarka.

90 Waxaa laga qoray barta internetka GCPEA, waxaana laga eegay 22-kii Juun 2015: http://www.protectingeducation.org/guidelines. Qabya qoraalka Tilmaamaha ayaa lagu magacaabo jiray Tilmaamaha Qabyada ah ee Lucens. Tilmaamaha oo dhamaystiran waxaa la baahiyay Disembar 2014. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan Tilmaamaha, tixraac GCPEA, 2014, Su'aalaha iyo jawaabaha ku aaddan Tilmaamaha ka hortagga in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu socdaan oo laga heli karo isla bartaasi internetka iyo GCPEA, 2015, Faallada Ku aaddan Tilmaamaha, waxaana labaduba laga helaa bartaasi internetka.

91 Waxaa laga qoray barta internetka GCPEA, waxaana laga eegay 12-kii Oktoobar 2015. Si aad ula degto nuqul iyo faahfaahin dheeraad ah oo ku aaddan Bayaanka, gaar ahaa liiska dalalka ansixiyay iyo qaabka loogu ololeeyo ansixintiisa, eeg: http://www.protectingeducation.org/guidelines/ support.

92 Si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo ku aaddan nidaamka sharciga caalamiga ah ee khuseeya xuquuqda waxbarashada, eeg: PEIC iyo BIICL, Difaaca Waxbarashada Deegaannada Amni darrada iyo Colaaddu ka jirto: Buugga gacanta ee Sharciga Caalamiga ah (2012) 12, 16, 112. Faahfaahin dheeraad ah oo ku aaddan nidaamka sharciga caalamiga ah ee khuseeya u adeegsiga iskuullada ujeedooyinka milateri, eeg: GCPEA, 2015, faallada Tilmaamaha ka hortagga in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu socdaan. Waxaa laga heli karaa: http://www.protectingeducation.org/sites/default/files/documents/commentary_on_the_guidelines.pdf.

93 Saxiixa waa kalmad sharci oo micnaheedu yahay "ogolaansho". Marka uu dal saxiixo heshiis, waa mid sharci ahaan u qabanaysa uuna qeyb ka yahay.

94 Ogow in heshiiska sidoo lagu lagu tilmaami karo axdi ama qaanuun.

95 ICESCR, Qodobka13(1): "Dalalka qeybta ka ah Axdiga hadda jira ayaa aqoonsan xaqa uu qof kasta u leeyahay waxbarashada. Waxa ay heshiis ku yihiin in waxbarashada lagu jiheeyo sidii si buuxda loogu hormarin lahaa shakhsiyadda bani'aadannimada leh, sharafta qofka iyo xoojinta ilaalinta xuquuqda aadanaha iyo xorriyadaha asaasiga ah. Waxay sidoo kale heshiis ku yihiin in waxbarashada ay dhammaan dadka u sahasho ka qeybgalka bulsho xor ah, hormarisa isfahanka, dulqaadka iyo saaxiibtinnamada dhammaan dalalka iyo shucuubta kala duwan, isla markaana hormarisa hawlaha Qaramada Midoobay ee ku aaddan ilaalinta nabada.



**Bogga hore:** Carruur Suuriyaan ah oo u socda iskuul ku yaal magaalada waqooyi bari ee Deir Ezzor 23-kii Janaayo 2014..

*© 2014 Ahmad Aboud/AFP/Getty Images*

**Bogga dambe:** Wiil Suuriyaan ah ayaa haya qori AK-47 xilli uu ka qeyb qaadanayo tababarka xooggaga mucaaradka ah 23-kii Janaayo 2013, ayadoo iskuul hore loo bedelay "akademiyad milateri" deegaanka Tlaleen ee gobolka Xaleb, waqooyiga Suuriya.

*© 2013 JM LOPEZ/AFP/Getty Images*

**Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada**
Xogheynta
350 5th Avenue, 34th Floor, New York, New York 10118-3299
Telefoonka: 1.212.377.9446
Emailka: GCPEA@protectingeducation.org

GCPEA

**www.protectingeducation.org**